# Hagaha Xuquuqda Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah



Ogeysiiska Habraacyada iyo Nidaamyada Waxbarashada Gaarka ah

Sebteembar 2024





Department of Education & Workforce

**KU SAABSAN WAXBARASHADA GAARKA AH .................................... 2**
*Xiriirka dugsigaaga ee Waxbarashada Gaarka ah .................................... 2*
*Xiriirka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Waxbarashada Gaarka ah ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce Contact for Special Education) .................................... 2*
**HORDHACA HAGAHAAN XUQUUQAHA WAALIDKA .................................... 3**
**MACLUUMAADKA GUUD .................................... 4**
*Oggolaanshaha Waalidiinta ee La Wargeliyay .................................... 4*
*Si aad u bixiso Oggolaanshahaaga Waalidka ee Lagu Wargeliyay, Wakaalada Waxbarashada waa inay: .................................... 6*
*Cunugaagu ma u Qalmaa Waxbarashada Gaarka ah? .................................... 7*
*Qiimeynada Waxbarashada Madaxa-banaan (Independent Educational Evaluations, IEE) ..... 8*
*Ogeysiiska Qoraalka Hordhaca ah .................................... 9*
*Barnaamijka Waxbarashada Shaqsi ahaaneed (Individualized Education Program, IEP) ...... 10*
**DIIWAANADA WAXBARASHADA .................................... 11**
*Helida Diiwaanada .................................... 11*
**XALLINTA KHILAAFKA .................................... 13**
*Nidaamka Xallinta Khilaafka .................................... 13*
*Xallinta Cabashada ee Hore .................................... 14*
*Fududeynta .................................... 14*
*Dhexdhexaadinta .................................... 17*
*Gudbinta Cabashada Gobolka .................................... 19*
*Muddada Gudbinta Nidaamka Cabashada .................................... 23*
**NIDAAMKA DHAGEYSIGA IYO WAQTIYADA DACWADA .................................... 25**
*Isku filnaanshaha .................................... 25*
*Muddada Xallinta .................................... 26*
*Nidaamka Dhageysiga .................................... 28*
*Waqtiga iyo Nidaamka Cabashada ee La Dedejiyay .................................... 29*
*Racfaan ka Qaadashada Go'aanka .................................... 29*
*Xaalada Carruurta inta lagu Jiro Nidaamka Dhageysiga Jiro Nidaamka Dhageysiga ............. 30*
*Khidmadaha Qareenka .................................... 31*
**ANSHAXA .................................... 33**
*Habraacyada Anshaxa ee Carruurta Qaba Naafonimada .................................... 33*
*Go'aaminta Waxa Sababay Habdhaqanka .................................... 34*
*Badelka Ku Meel Gaarka ah ee Goobta Waxbarashada (Ku Meel Gaarka ah iyo Ka duwan) 35*
**MEELEYNTA KELIYA EE CARRUURTA NAAFADA AH EE AY DHALLEEN WAALIDIINTA DUGSIGA GAARKA AH AYNA KHARASHKA DADKU DHIIBAAN .................................... 37**
*Nidaamka Go'aaminta Dib u celinta Lacagta .................................... 37*
**OGEYSIISKA WAALIDKA EE BARNAAMIJYADA DEEQDA WAXBARASHADA EE LOOGU TALAGALAY ARDAYDA QABA NAAFONIMADA .................................... 38**
*Marka Ogeysiiska Dhaco .................................... 38*


Ohio Department of Education & Workforce

# Ku saabsan Waxbarashada Gaarka ah

Waxbarashada gaarka ah, ee loogu talagalay ardayda jira 3 ilaa 21 sano, ee lagu hago shuruudaha gobalka iyo kuwa federaalka. Shuruudaha federaalka waxaa loo tixraacaa sida Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA). Shuruudaha gobolka waxaa loo tixraacaa Heerarka Hawlgelinta Ohio ee Waxbarashada Carruurta Naafada ah (Heerarka Hawl-gelinta Ohio).

Hagahaan ayaa kaa caawin kara inaad fahanto xuquuqahaaga iyo xuquuqda cunugaaga sida ay dhigayaan IDEA iyo Heerarka Hawlgalka Ohio. Sidoo kale waxaad ka helaysaa macluumaad iyo agab kaa caawinaya inaad fahamto taageerada iyo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga.

Hay'ada waxbarashada ee deegaankaaga (tusaale ahaan, degmadaada dugsi) ayaa sidoo kale kaa caawin karta inaad fahanto xuquuqahaaga hoos yimaada sharcigaan. Haddii aad qabto su'aalo ku

*Fadlan macluumaadkaan soo socda ku dar qaybtaan muhiimka ah:*
Hay'ada waxbarashada:
Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah:
Lambarka taleefoonka:
Cinwaanka Iimaylka:

saabsan macluumaadka ku jira hagahan, fadlan la xiriir agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee hay'ada waxbarashadaada.

## Xiriirka dugsigaaga ee Waxbarashada Gaarka ah

## Xiriirka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Waxbarashada Gaarka ah ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce Contact for Special Education)

(Taleefoonka) 614-466-2650
(Khadka bilaashka ah) (877) 644-6338.
(Fakiska) 614-728-1097

25 S. Front Street
Mail Stop 409
Columbus, Ohio 43215
Macluumaadka Xiriirka ee Dheeraadka ah

Exceptionalchildren@education.ohio.gov

Dadka wicitaanada sameynaaya ee adeegsanaya aalada qoraalka (TTY), fadlan wac adeeg Wicitaanka Ohio oo lambarkoodu yahay (800) 750-0750.



Department of Education & Workforce

# Hordhaca Hagahaan Xuquuqaha Waalidka

Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah (IDEA) wuxuu ilaaliyaa xuquuqaha ardayda naafada ah iyo xuquuqaha waalidiintooda. Hagahaan wuxuu kuu sheegayaa xogo ku saabsan xuquuqahaan. Dugsigaagu waa inuu ku siiyaa nuqulka hagaha sanadkiiba hal mar haddii cunugaagu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah. Sidoo kale waa inaad hesho nuqul:

- Haddii aad codsato in cunugaaga lagu sameeyo qiimeyn sababo la xariira inaad u maleyneyso in cunugaagu qabi karo naafonimo.
- Haddii hay'adaada waxbarashadu ay dooneyso in cunugaaga la qiimeeyo sababo la xariira inay u malaynayaan in cunugaagu uu naafo qabo
- Haddii aad u gudbiso (xareyso) cabasho - qoraal ah - xafiiska Carruurta Baahiyaha qaba ee Waaxda Ohio ee Waxbarashada iyo Shaqaalaha, uuna yahay cabashadaadii koowaad ee sanad dugsiyeedka
- Haddii aad u gudbiso (xareyso) codsi – qoraal ah – xafiiska Carruurta Baahiyaha qaba ee Waaxda Ohio ee Waxbarashada iyo Shaqaalaha sababo la xariira nidaamka dhageysiga caddaalada ah ee la xariira waxbarashada cunugaaga, ayna tahay markii koowaad ee sanad dugsiyeedka codsatay mid
- Haddii cunugaaga dugsiga looga saaray sababo edbin (dhaqan-xumo) - cunugaagana horey looga saaray dugsiga 10 maalmood ama ka badan inta lagu jiro sannad dugsiyeedka hadda
- Waqti kasta oo aad codsato nuqulka hagaha



# Macluumaadka Guud

## Oggolaanshaha Waalidiinta ee La Wargeliyay

Qof walba oo uu akhrin karaa qiimeynta waxbarashada gaarka ah ee ilmaha Mar kasta, oo aad adiga, waalidka, aad qabtaan cabasho la xariirta waxbarashada cunugaaga, korriinka, ama xirfadahiisa, waa inaad u soo gudbisaa codsi qoraal ah oo ku saabsan qiimaynta waxbarashada gaarka ah macalinka ilmaha, maamulaha dugsiga, iyo kormeeraha waxbarashada gaarka ah ama maamulaha. Marka dugsigu helo codsiga, dugsigu wuxuu haystaa 30 maalmood inuu kuugu soo jawaabo kuulana socodsiiyo go'aanka qiimeynta ama haddaan qiimeyn la sameyneyn. Waalidku waa inuu bixiyaa oggolaansho qoraal ah si loo bilaabo nidaamka qiimeynta.

Marka ilmo loo go'aamiyo inuu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, Barnaamijka Waxbarashada Shaqsi (IEP) ayaa la abuuri doonaa iyadoo lagu salaynayo xogta warbixinta kooxda qiimaynta (evaluation team report, ETR). IEP-da waa dukumiinti qoraal ah oo qeexaya yoolalka waxbarasho iyo ujeedooyinka cunugaagu ka shaqayn doono inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Sidoo kale waxaa ku qoran taageerada iyo adeegyada cunugaagu u baahan yahay si uu u gaaro yoolalka lagu dejiyay IEP-ga.

Cunugaaga waxaa loo qoondeyn doonaa koox IEP ah, oo xubno ay ka yihiin:

- Waalidka(iinta)
- Ugu yaraan hal kamid ah macalimiinta waxbarashada guud (haddii cunugu, ama laga yaabo, inuu ka qaybgalo goobta waxbarashada caadiga ah)
- Ugu yaraan hal kamid ah macalimiinta waxbarashada gaarka ah ama daryeel bixiyaha cunugaaga
- Wakiil ka socda hay'ad waxbarasho oo xaqiijin haysata
- Shaqsi tarjumi kara saameynta tilmaamaha ee natiijooyinka qiimeynta
- Go'aanka waalidka ama hay'ada waxbarashada kadib, shaqsiyaadka kale ee aqoonta u leh ama khibrad gaar ah u leh ilmaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha adeegyada la xiriira sida ku habboon
- Marka kasta oo ay ku habboon tahay, ilmaha naafonimada qaba

**Dib u eegista IEP:** Kooxda IEP-ga waxa looga baahan yahay inay kulmaan ugu yaraan hal mar sanadkii si ay dib ugu eegaan IEP-da laakiin waxay kulmi karaan marar badan si ay dib u eegis ugu sameeyaan IEP-da, gaar ahaan haddii uusan ilmuhu horumar samaynayn. Sida uu dhigaayo sharciga Ohio, oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay si loo bilaabo adeegyada waxbarashada gaarka ah laakiin loogama baahna hirgelinta dib u eegista IEP-ga xigga. Hase

**Waa maxay waalidka ku meel gaarka ah ee ilmaha?**
Waalidka ilmaha ee ku meel gaarka ah waa shaqsi laga yaabo inuu ku matalo ilmo naafo ah dhammaan arrimaha la xiriira u-qalmitaanka iyo helitaanka adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Hay'ada waxbarashada ee meesha aad ku nooshahay ayaa magacawda waalid ku meel gaar ah mar kasta oo ay dhacdo mid ka mid ah arrimahaan:

- Marka waalidka ilmaha aan la aqoonsan karin
- Marka hay'ada waxbarashada, kadib marka ay sameyso dadaalada macquulka ah, ay aqoonsan wayso waalidka
- Marka ilmaha uu wehliyo qof dhallinyaro ah oo derbi jiif ah
- Marka ilmuhu kujiro daryeelka gobalka



Ohio Department of Education & Workforce

yeeshee, ka qaybqaadashada joogtada ah ee waalidka ee nidaamka IEP-ga ayaa weli ah muhiim. Waalidiinta ayaa looga baahan yahay marka xubnaha kooxda IEP-ga qabanayaan kulan kasta oo dib u eegis ah.

**Ka qaybgalka waalidka**: Waalidiinta ilmo naafada ah ka ahaan, waxaad xaq u leedihiin in lagu idin ogeysiiyo oo la idin siiyo fursad aad kaga qaybgashaan kulan kasta oo kooxda IEP-ga qabanayaan. Hay'ada waxbarashadu waa inay ku siiso ogaysiis ku saabsan kulanka xili hore si loo hubiyo inaad awoodo inaad ka soo qaybgasho iyo in kulanka lagu qabto wakhti iyo goob la isla gartay.

Oggolaanshaha waalidka ee oggaal loo yahay waxaa loola jeedaa in adiga iyo/ama wakiilka ku meel gaarka ah ee hay'ada waxbarashadu aad u fasaxaysaan, qoraal ahaan, hay'ada waxbarashadu inay talaabo qaado. Oggolaanshahaaga xog ogaalku aad u tahay sidoo kale wuxuu ka dhigan yahay in hay'adu waxbarashadu ku siisay macluumaadka ku saabsan tallaabada la soo jeediyay. Hay'ada waxbarashadu waa inay hesho oggolaanshahaaga qoraalka ah ee xog oggaalka aad u tahay:

- Kahor inta hay'ada waxbarashadu qiimeyn cunugaaga markii ugu horaysay si ay u ogaadaan in cunugaagu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira iyo in kale.
- Kahor inay aysan hay'ada waxbarashadu bilaabin inay siiso cunugaaga adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ku qoran barnaamijkiisa ama barnaamijkeeda waxbarasho ee ugu horreeya, oo sidoo kale loo yaqaan IEP
- Ka hor inta aan hay'ada waxbarashada dib u qiimeyn cunugaaga si loo ogaado in baahiyaha cunugaaga is badeleen
- Ka hor inta aysan hay'ada waxbarashada sameyn qiimeyn dheeraad ah oo shaqsi oo lagu sameeyo cunugaaga. Tusaale ahaan waxay noqon kartaa qiimeynta habdhaqanka waxqabadka
- Ka hor in aysan hay'ada waxbarashadu badelin meelaynta waxbarashada cunugaaga. Tani micnaheedu maahan in la badelaayo goobta dhismaha. Taas badelkeeda, waxay ka dhigan tahay isbadel ku imaanaya barnaamijka waxbarashada cunugaaga
- Ka hor inta aysan hay'ada waxbarashada siin macluumaad ku saabsan cunugaaga qof kale oo aan ahayn kuwa ku qoran sharciga gobolka ama kan federaalka

Oggolaanshaha waalidka ee xog ogaal ay u yhiin ayaa looga baahan yahay dib u qiimeynta xitaa haddii kooxda IEP ay go'aansadaan in macluumaadka ardayga ee hadda jira uu ku filan yahay, oo aan loo baahnayn qiimeyn dheeraad ah. Arrintaan waxaa mararka qaarkood loo yaqaan “dib u eegista diiwaanka” dib u qiimeynta.

**Oggolaanshaha waalidka ee xog ogaalka ah ayaa loo baahan yahay marka arrimahaan midkood dhacaan:**

- Marka hay'ada waxbarashada dib u eegeyso xogta ardayda ee hadda jirta ee qaybta ka ah nidaamka dib u qiimeynta/dib u eegista
- Marka hay'ada waxbarashu sameyneyso qiimeynada cunugaaga ee lagu diiwaangeliyo dhammaan ardayda.

## Si aad u bixiso Oggolaanshahaaga Waalidka ee Lagu Wargeliyay, Wakaalada Waxbarashada waa inay:

- Hubiso inaad isticmaashay luuqadaada hooyo, ama qaab kale oo isgaarsiineed oo aad fahamsan tahay, si aad u siiso dhammaan macluumaadka aad u baahan tahay si loo gaaro go'aan
- Hubiso inaad fahmeyso oo aad ku raacsan tahay qoraal ahaan hay'ada waxbarashada inay fuliso hawlaha oggolaanshahaaga ayaana sharaxaya waxqabadka, iyo sidoo kale mid kasta oo ka mid ah diiwaanada cunugaaga ee lala wadaagi doono dadka kale iyo cidda lala wadaagi doono
- Hubiso inaad fahansan tahay inaad oggolaanshahaaga ku bixineyso qaab ikhtiyaar ah, oo aad badeli karto maskaxdaada wakhti kasta
- Hubiso inaad fahansan tahay in haddii aad ka laabato oggolaanshahaaga, hay'ada waxbarashada aysan u baahnayn inay ka laabato tallaao kasta oo ay qaadatay inta u dhexeysa waqtiga aad siisay oggolaanshaha iyo waqtiga aad ka laabatay

### KA LAABASHADA OGGOLAANSHAHA

Ka laabashada oggolaanshaha micnaheedu waa inaad ka laabato oggolaanshahaaga. Waad ka laaban kartaa oggolaanshahaaga waqti kasta haddii aad go'aansato inaadan dooneyn in cunugaagu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee lagu bixiyo IEP-da cunugaaga. Waa inaad oggolaanshaha *qoraal uga laabato*.

Kadib, hay'adaada waxbarashada:

- Waa inay joojisaa siinta cunugaaga adeegyada waxbarashada gaarka ah ee IEP, laakiin ka hor inta aysan joojin bixinta adeegyada, hay'ada waxbarashadu waa inay ku siiyaan ogeysiis qoraal ah oo lagugu ogeysiinaayo in la joojiyay adeegyada. Ogeysiiska ay hay'ada waxbarashadu ku siiso waxaa lagu magacaabaa ogeysiiska hordhaca ah ahna qoraalka. Ogeysiiskaan hordhaca ah ahna qoraalka waa inuu buuxiyaa shuruudaha ku xusan qaybta Ogeysiiska Qoraalka Hordhaca ah ee bogga 8 aad ee hagahan.

Marka hay'ada waxbarashada ay ku siiso ogeysiiskaan hordhaca ah ahna qoraalka oo sheegaya inaysan mar dambe siin doonin cunugaaga adeegyada waxbarasha ee gaarka ah iyo marka adeegyada la joojiyo, hay'ada waxbarashadu mar dambe uma tixgeliso cunugaaga inuu u qalmo waxbarashada gaarka ah taas badalkeedna waxay u tixgelin doonaan cunugaaga inuu yahay arday waxbarashada guud dhigta.

# Cunugaagu ma u Qalmaa Waxbarashada Gaarka ah?

Si loogu tixgeliyo arday inuu yahay arday qaba baahiyada naafonimada sida ku xusan Xeerka Naafonimada ee Shaqsiyaadka (IDEA) iyo Xeerka Maamulka Ohio, cunugaagu waa inuu qabo mid kamid ah naafonimadaan hoos ku xusan. Naafonimadu waa inay saameyn xun ku yeelataa waxqabadka waxbarashada cunugaaga iyo waana in cunugaagu u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo/ama adeegyo la xiriira naafonimadiisa awgeed.

- Naafonimada Garaadka
- Cilada maqalka
- Cilada hadalka ama luuqada
- Cilada araga
- Cilad shucuurta la xariirta
- Curyaanimada lafaha
- Ootasimka
- Dhaawac maxkax oo aad u daran
- Cilad caafimaad oo kale
- Naafonimo si gaar ah ula xiriirta waxbarashada
- Dhagoolnimo
- Dhagoolnimo-indho la'aan
- Naafonimo badan
- Daahitaanka Kobaca

**Luuqada Hooyo ama Hab Xiriir oo Kale**

Dhammaan kulanada aad ka qaybgasho, qiimeynta cunugaaga, iyo dhammaan ogaysiisyada aad hesho waa inay ku qoran yihiin ama lagu sheegaa afkaaga hooyo ama habka kale ee isgaarsiinta aad isticmaasho.

Dhammaan tijaabooyinka iyo agabka kale ee loo isticmaalo in lagu qiimeeyo cunugaaga waa inay ahaadaan kuwo ku baxaya afka hooyo ee cunugaaga — ama hab kale oo isgaarsiin oo siin doona degmada macluumaad sax ah oo ku saabsan waxa cunugaagu yaqaano oo uu ku samayn karo tacliin ahaan, korriin ahaan iyo shaqo ahaanba, ilaa inaan si cad loo bixin karin ama loo maamulin karin maahee.

## KA CODSO HAY'ADA WAXBARASHADA INAY QIIMEYSO CUNUGAAGA

Haddii aad u malayneyso in cunugaagu yeelan karo naafonimo saamaynaysa waxbarashadiisa, waxaad ka codsan kartaa hay'ada waxbarashada inay qiimeyso cunugaaga si loo go'aamiyo in uu qalmi doono waxbarashada gaarka ah (loogu tixgeliyo ilmo naafo ah sida ku xusan xeerka IDEA). Hay'ada waxbarashadu waa inay kaga soo jawaabtaa 30 maalmood gudahooda codsigaaga kadib marka ay hesho midkood ogolaanshahaaga xog ogaalka ah ama ay bixiso ogaysiis hordhaca ah ahna qoraal oo sharaxaya sababta hay'ada waxbarashadu aanay uga shakin naafo. Hay'ada waxbarashadu waxay ku waydiin kartaa wakhti kasta oggolaansho si loo qiimeeyo cunugaaga loona eego naafonimada la tuhunsan yahay. Hase yeeshee, ka dib marka hay'ada waxbarashadu ay hesho oggolaanshahaaga xog ogaalka ah ahna qoraalka, waa inay ku dhammaysaa qiimeynta hordhaca ah (koowaad) 60 maalmood gudahood.

## HADDII CUNUGAAGU KA BAXO DUGSI UNA WAREEGO DUGSI KALE

Haddii cunugaagu ka baxo hal hay'ad waxbarasho una wareego hay'ad waxbarasho oo kale oo ka jirta Ohio, hay'ada cusub ee waxbarashada waxay haysataa 30 maalmood laga bilaabo taariikhda qiimeynta hay'ada waxbarashada ee hordhaca ah kadib marka ay hesho midkood:

- Aqbalida qiimeynta hay'ada waxbarashada ee hore; ama
- Helida oggolaanshaha dib u qiimeynta

Dib u eegis kasta oo ay sameysay hay'ada cusub ee waxbarashada waa in lagu sameeyaa 60 maalmood gudahood ka dib oggolaanshahaaga waalidnimada.

### MARKA ILMUHU KUJIRO DARYEELKA GOBALKA

Haddii ilmuhu ku jiro *daryeel gobal* uusan la noolayn waalidkiisa ama waalidkeed, hay'ada waxbarashadu ugama baahna oggolaanshaha waalidka si loo sameeyo qiimaynta hordhaca ah loona go'aamiyo in ilmuhu yahay ilmo naafo ah xaaladahan soo socda marka ay jiraan:

- Haddii, kadib marka la sameeyo dadaalada macquulka ah, hay'ada waxbarashada aysan aqoonsan karin waalidka ilmaha
- Haddii xuquuqaha waalidiinta meesha laga saaro; ama
- Haddii xuquuqaha waalidiinta uu qareen u xilsaaro shaqsi bixiya oggolaanshaha qiimeynta hordhaca ah.

## Qiimeynada Waxbarashada Madaxa-banaan (Independent Educational Evaluations, IEE)

Qiimeynta waxbarashada madaxa banaan (IEE) waxa kale oo loo yaqaan qiimeyn banaanka ah. Hay'ada waxbarashada ayaa bixin doonta qiimeyntaqn banaanka oo keliya haddii ay horey u sameysay qiimeynteeda cunugaaga oo aadan ku qancin waxa ay hay'ada waxbarashada heshay cabashadaada). Ujeedadu waa in la ogaado in cunugaagu u baahan yahay waxbarasho gaar ah ama uu sii wado inuu u baahdo waxbarasho gaar ah. Qofka cunugaaga ku sameynaaya qiimeyntaan banaanka uma shaqeyn karo hay'ada waxbarashada cunugaaga. Adiga, ka waalid ahaan, waxaad xaq u leedahay, waqti kasta, inaad diyaariso oo aad bixiso qiimeyn banaanka oo lagu sameeyo cunugaaga. Marka aad ku qanacdo qiimeynta hay'ada waxbarashadaada ee ilmahaaga oo aad codsato qiimeyn banaanka, hay'adda waxbarashadaadu waa inay qaadataa mid ka mid ah tallaabooyinkaan iyada oo laga fogaanaayo dib u dhaca aan muhiimka ahayn:

- Hay'ada waxbarashadu waa inay kuu sheegtaa meesha aad ka heli karto qiimeyn banaanka ee cunugaaga lagu sameynaayo oo adigu kharashka bixineyso waana inay ku ogeysiisaa shuruudaha lagama maarmaanka u ah hay'ada waxbarashada si ay u bixiso kharashka. Marka hay'ada waxbarashadu oggolaato oo aad hesho qiimeynta banaanka, hay'ada waxbarashadu waa inay bixiso kharashka.
- Hay'ada waxbarashadu waa inay codsi u gudbisaa Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Waaxda Carruurta ee Ohio si loo dhageysto dhageysi ku habboon (fiiri bogga 20 aad) maadaama aysan aqbalsaneyn codsigaaga qiimeynta banaanka. Arrintaan ayaa imaan kara sababo la xariira in hay'ada waxbarashu in qiimeynteedu ahayd in ku habboon cunugaaga

### SHURUUDA QIIMEYNADA BANAANKA

Shuruudaha la midka ah ee khuseeya qiimeynta ay hay'ada waxbarashada qabato ayaa sidoo kale khuseeya qiimeynta banaanka ee aad qabanqaabiso, hay'ada waxbarashaduna ayaa bixisa. Shuruudahaan waxaa ka mid ah meesha cunugaaga qiimeynta ka raadsanaayo iyo khibrada qofka qiimeynta cunugaaga ku sameynaaya. Hay'ada waxbarashadu waa inay bixiso kharashka buuxa ee qiimeyn banaanka oo buuxisa shuruudaha hay'ada waxbarashada.

Haddii aad codsato qiimeyn banaanka oo cunugaaga lagu sameeyo, hay'ada waxbarashada ayaa laga yaabaa inay ku weydiiso sababta aad ugu raacsan tahay qiimeynta hay'ada waxbarashada ee cunugaaga (taas oo ah, sababaha aad u dooneyso qiimeyn banaanka ah), laakiin qasab ma ahan inaad sharaxdo tan ilaa aad dooneyso inaad sidaas sameyso maahee. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay hal qiimeyn oo banaanka oo kharashkeedu sameyso hay'ada waxbarashada, mar kasta oo ay hay'ada waxbarashada ay qiimeyso cunugaaga oo aadan ku raacsaneyn natiijooyinka qiimeynta hay'ada waxbarashada.

Marka cunugaagu maro qiimeyn banaanka lagu sameeyay oo buuxisa shuruudaha hay'ada waxbarashada, iyadoon loo eegin cidda bixisa kharashka, waa in hay'ada waxbarashada ay tixgeliso natiijooyinka qiimeyntaas oo ayna go'aamiso sida ay cunugaagu u siin doonto waxbarasho dadweyne oo lacag la' aan ah (FAPE).

# Ogeysiiska Qoraalka Hordhaca ah

## GUUD MARKA GUUD

Hay'ad waxbarasho waa inay ku siisaa ogeysiis qoraal ah (oo loo yaqaan ogeysiis hordhaca ah ahna qoraal) waqti macquul ah ka hor inta aysan soo jeedin ama diidin inay qaado tallaabo gaar ah. Tallaabooyinkaan waxaa ka mid ah in hay'ada waxbarashada billoowdo ama badesho aqoonsiga, qiimeynta ama meelaynta waxbarashada cunugaaga ama bixinta waxbarashada dadweynaha ee bilaashka ah ee ku habboon cunugaaga. Ogeysiiska qoraalka ah ee hordhaca ah waa foomka waxbarashada gaarka ah oo muhiim ah.

## MAWDUUCYADA OGEYSIISKA QORAALKA HORDHACA AH

Ogeysiiska qoraalka hordhaca ah waa inuu bixiyo qeexitaan badan oo kuu oggolaanaya inaad ka qeybqaadato go'aamada adeegyada waxbarashada cunugaaga si xog-ogaal ah. Ogeysiiska qoraalka hordhaca ah waa inuu ka kooban yahay:

- Qeexitaanka tallaabada lasoo jeediyay ama ay diiday hay'ada waxbarashada
- Sharaxaada sababta dugsigu u soo jeedinayo ama u diidayo in uu tallaabada qaado
- Qeexitaanka ku saabsan hab kasta oo qiimeyn ah, dib u eegista, diiwaangelin ama warbixinta dugsiga loo isticmaalo in uu go'aan ka gaaro
- Bayaan muujinaaya inaad haysato ilaalinta hoos timaada Habraacyada iyo Nidaamyada IDEA, iyo in ogeysiisku aanu ahayn tixraac hordhac ah oo qiimayn, siyaabaha aad ku heli karto sharraxaadda ilaalinta nidaamka
- Ilo ku siinaya inaad sameyso xiriir caawimaad si aad u fahamto shuruudaha IDEA
- Qeexitaanka ikhtiyaarada kale ee kooxda IEP-ga ay eegtay iyo sababta ikhtiyaaradaas kale loo diiday
- Qeexitaanka arrimaha kale ee muhiim u ah soo jeedinta ama diidmada dugsiga

## OGEYSIISKA QORAALKA HORDHACA AH OO KU QORAN LUUQADA LA FAHMI KARO

Ogeysiiska qoraalka hordhaca ah waa in lagu bixiyaa luuqad ay fahmi karaan dadweynaha guud sidoo kale waa in lagu qoraa luqadaada hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed haddii aysan si cad u jirin wax arrintaas caqabad ku ah.

Haddii luuqadaada hooyo ama hab kale oo isgaarsiineed aysan *ahayn* luuqad qoraal ah, markaas hay'ada waxbarashada waxay u baahan tahay inay qaado tallaabooyin ay ku turjumeyso ogeysiiska qoraalka hordhaca ah, ama hab kale oo la fahmi karo, si loogu turjumo luuqadaada hooyo ama hab

kale oo isgaarsiineed. Hay'ada waxbarashada waxay u baahan doontaa inay hubiso inay muujin karto, qoraal ahaan, in ogeysiiska qoraalka hordhaca ah loo turjumay si habboon iyo inaad fahamtay waxyaabaha ku jira.

## Barnaamijka Waxbarashada Shaqsi ahaaneed (Individualized Education Program, IEP)

Barnaamijka waxbarashada shaqsi (IEP) waa dukumiinti bayaan ah oo qeexaya yoolalka waxbarashada iyo hadafyada cunugaaga ka shaqeyn doono inta lagu jiro sanad dugsiyeedka. Sidoo kale waxaa ku qoran taageerada iyo adeegyada cunugaagu u baahan yahay si uu u gaaro yoolalka lagu dejiyay IEP-ga.

Xubnaha kooxda IEP-ga waxaa kujira:

- Waalidka(iinta)
- Ugu yaraan hal kamid ah macalimiinta waxbarashada guud (haddii cunugu ama laga yaabo inuu ka qaybgalo goobta waxbarashada caadiga ah)
- Ugu yaraan hal kamid ah macalimiinta waxbarashada gaarka ah ama daryeel bixiyaha cunugaaga
- Wakiil ka socda hay'ad waxbarasho oo xaqiijin haysata
- Shaqsi tarjumi kara saameynta tilmaamaha ee natiijooyinka qiimeynta
- Go'aanka waalidka ama hay'ada waxbarashada kadib, shaqsiyaadka kale ee aqoonta u leh ama khibrad gaar ah u leh ilmaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha adeegyada la xiriira sida ku habboon
- Marka kasta oo ay ku habboon tahay, ilmaha naafonimada qaba

**Dib u eegista IEP** Kooxda IEP-ga waxa looga baahan yahay inay kulmaan ugu yaraan hal mar sanadkii si ay dib ugu eegaan IEP-da laakiin waxay kulmi karaan marar badan si ay dib u eegis ugu sameeyaan IEP-da, gaar ahaan haddii uusan ilmuhu horumar samaynayn. Gobalka Ohio, dib u eegista IEP-ga iyo dib u eegista sanadlaha ah uma baahna oggolaanshaha waalidka si loo hirgeliyo IEP-ga. Oggolaanshaha waalidka waxaa looga baahan yahay oo keliya IEP-ga hore. Waxaad door firfircoon ka qaadanaysaa bixinta wax soo saarka horumarinta IEP-ga waxaana si xoog leh loo dhiirigelinayaa in laga qaybqaato dib u eegista IEP-ga.

**Ka qaybgalka waalidka**: Waalidiinta ilmo naafada ah ka ahaan, waxaad xaq u leedihiin in lagu idin ogeysiiyo oo la idin siiyo fursad qiimo jaban oo aad kaga qaybgashaan kulan kasta oo kooxda IEP qabanayaan. Hay'ada waxbarashadu waa inay ku siiso ogaysiis ku saabsan kulanka xili hore si loo hubiyo inaad awoodo inaad ka soo qaybgasho iyo in kulanka lagu qabto wakhti iyo goob la isla gartay.



# Diiwaanada Waxbarashada

## Helida Diiwaanada

Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Dhowrista Xogta (Family Educational Rights and Privacy Act, FERPA) waa sharci federaal ah oo ku siinaya xuquuqo gaar ah si aad u hubiso una eegto diiwaanka waxbarashada ee carruurtaada. Xuquuqaha hoos yimaada sharciga FERPA wuxuu kaa wareejinayaa ardaygaaga marka ardaygaagu gaaro 18 sano ama uu bilaabo inuu dhigto waxbarashada dugsiga sare kadib (sida kuleejka ama jaamacad), hadba kii soo hormara.

### WAA MAXAY DIIWAANADA WAXBARASHADA?

Haddii macluumaad gaar ah oo ku saabsan ardayga lagu ilaaliyo sharciga FERPA waxay ku xiran in sheygu buuxiyo macnaha diiwaanka waxbarashada iyo in kale. FERPA waxay u qeexdaa diiwaanka waxbarashada sida:

1. Diiwaanada sida tooska ah ugu xiran hal arday oo gaar ah, oo mararka qaarkood loogu yeero macluumaadka si shaqsi ah uu u aqoonsan karo dugsigu
2. Diiwaanada ay hayaan hay'ad waxbarasho ama machad (tusaale ahaan, degmo Dugsiyeedka) ama cid u shaqeysa hay'addaas

### MACLUUMAADKA QOFKA LAGU AQOONSAN KARO WAXAA KAMID AH:

- Magaca cunugaaga
- Magaca xubin kamid ah qoyska
- Ciwaanka cunugaaga ama ciwaanka qoyska
- Aqoonsiga shaqsiga, sida lambarka amniga bulshada ee cunugaaga, lambarka ardayga ama diiwaanka faraha
- Hababka kale oo aan toos ahayn ee lagu aqoonsan karo cunugaaga, sida taariikhda dhalashada, goobta dhalashada, magaca hooyada, jinsiga ama qowmiyadda
- Macluumaad kale ee, keligiis ah ama isku dhafan, lalana xiriiriyo ama lala xiriirin karo arday gaar ah oo u oggolaan doona qof macquul ah oo ku jira bulshada dugsiga, oo aan aqoon shaqsi ah u lahayn duruufaha khuseeya, si loo aqoonsado ardayga marka la sameeyo hubin macquul ah
- Macluumaadka uu codsado qof dugsigu aaminsan yahay inuu aqoon u leeyahay aqoonsiga cunugaaga
- Tusaalooyinka kale sida lagu qeexay FERPA

### DIIWAANADA JOOGTEYNTA IYO DHOWRISTA XOGTA

Diiwaanada waxbarashada waxaa loo ilaalin karaa qaabab badan. Qaar kamid ah tusaalooyinka waa:

- Qoraalka gacanta
- Daabacaada
- Kumbuyuutarka
- Cajalad muuqaal ama maqal ah
- Cajalad, duubitaan, ama cajalad muuqaal ah

Diiwanaada ardayga waa qarsoodi, oo ka dhigan inaan cidna arki *karin*. Hay'ada waxbarashada waa inay ilaalisaa xogta diiwaanada cunugaaga marka ay uruuriso, kaydiso, sii deyso ama baabi'iso.

## DIB U EEGISTA DIIWAANADA CUNUGAAGA

Hay'ada waxbarashada waa inay kuu oggolaato inaad dib u eegto diiwaanka waxbarashada cunugaaga iyada oo aan loo baahnayn dib u dhac iyo ka hor kulanka kooxda IEP-ga ama nidaam socod kasta oo ku habboon oo aad ku lug leedahay. Hay'ada waxbarashada ma sugi karto wax ka badan 45 maalmood oo laga bilaabaayo taariikhda codsigaaga si ay kuugu oggolaato inaad aragto diiwaanada

Waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegto oo keliya macluumaadka ku jira diiwaanka ku *saabsan* cunugaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad dugsiga ka codsato sharraxaad ku saabsan diiwaanka cunugaaga. Waxaad xaq u leedahay inaad haysato qof kugu matala dib u eegista diiwaanada ( sida saaxiib ama qareen).

Hay'ada waxbarashada ayaa ku siin karta nuqulo ka mid ah diiwaanada cunugaaga; hase yeeshee, hay'ada waxbarashada waa inay ku siiso nuqulo haddiina ay ku guuldareysato inay sidaas sameyso waxay kaa horjoogsaneysaa inaad isticmaasho xuquuqahaaga dib u eegista diiwaanada. Waxaad mar walba xaq u leedahay inaad hesho nuqulo ka mid ah diiwaanka adoo kharashka iska bixinaaya.

## ISBADELO KU SAMEYNTA DIIWAANADA WAXBARASHADA

Waxaad xaq u leedahay inaad ka codsato hay'ada waxbarashada inay badesho macluumaad khaldan ama marin habaabin ah oo ku jira diiwaanka waxbarashada cunugaaga. Dugsiga cunugaaga uma baahna inuu badelo diiwaanada waxbarashada iyadoo loo eegayo codsigaaga (sababo la xariira kaliya inaad codsatay), laakiin dugsigu waa inuu *tixgeliyo* codsigaaga. Haddii dugsigu go'aamiyo inuusan wax ka badelin diiwaanka cunugaaga sida aad codsatay, dugsigu waa inuu kuu sheegaa inaad xaq u leedahay dhageysi si aad uga hadasho arrinta.

Dhageysiga ka dib, haddii dugsigu weli go'aansado inuusan wax ka badelin diiwaanka waxbarashada, waxaad xaq u leedahay inaad ku darto bayaankaaga ku saabsan arrinta diiwaanka cunugaaga. Bayaankaan waa inuu sii ahaado qayb ka mid ah diiwaanka cunugaaga.

## WADAAGISTA DIIWAANADA WAXBARASHADA

Sida caadiga ah, hay'ada waxbarashadu *waa* inay hesho oggolaanshahaaga qoraalka ah haddii ay dooneyso inay la wadaagto diiwaanka waxbarashada ee cunugaaga lagu aqoonsanaya qof aan adiga ahayn. Hase yeeshee, waxaa jira xaalado qaar oo keenaya inaan oggolaanshahaaga aan loo baahnayn. Si aad wax badan uga ogaato marka hay'ad waxbarasho *aysan*u baahnayn inay hesho oggolaanshahaaga qoraalka ah si ay ula wadaagto diiwaanada cid kale, eeg Hagaha Guud ee xeerka FERPA ee loogu talagalay waalidiinta ku nool Mareykanka. Mareegta Waaxda Waxbarashada www.ed.gov.

# Xallinta Khilaafka

## Nidaamka Xallinta Khilaafka

Haddii aad ka walaacsan tahay waxbarashada cunugaaga naafada ah, tallaabada ugu horreysa waa inaad la shaqeyso hay'adaada waxbarashada. Si aad u billoowdo hawshaan, la xiriir macallinka ardaygaaga ama agaasimaha waxbarashada gaarka ah. U sheeg qofkaas waxa aad ka fakareyso. Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashada aysan kugu raacsaneyn walaacaaga, waxaa jira siyaabo aad si wadajir ah uga wada shaqeyn karaan xallinta dhibaatada.

Nidaamyadaan waxay leeyihiin magacyo rasmi ah oo hay'adaada waxbarashada ay isticmaali karto, laakiin hagahaan ayaa kaa caawin doona inaad fahamto waxa magacyadaas loola jeedo iyo sida adiga iyo dugsigu u caawin kartaan cunugaaga. Qaybta soo socota waxay sharaxaysaa habraacyadaan ama qaababka aad u isticmaali karto si aad ula shaqeyso hay'adaada waxbarashada.

### DIB U EEGISTA MAAMULKA

Haddii aadan waafaqsanayn go'aanka hay'ada waxbarashada ee ku saabsan waxbarashada cunugaaga naafada ah, waxaad cabasho u gudbin kartaa maamulka hay'ada. Jawaab ahaan, kormeeraha guud ee hay'ada waxbarashada (ama qof loo xilsaaray) ayaa sameyn doona dib u eegis maamul. Dib u eegistaan waxaa ka mid noqon kara dhageysi maamulku qabto.

Dhageysiga Haddii mid la qabto, waa inuu ku dhacaa wakhti iyo meel u shaqeysa dhammaan kaqeybgalayaasha loo baahan yahay. Adiga iyo hay'ada waxbarashada labadaba waxaad ku casuumi kartaan dadka kale inay kasoo qaybgalaan dib u eegista ama dhageysiga maamulka. Tusaale ahaan, waxaad ku casuumi kartaa xubnaha kale ee qoyska ama saaxiibada kamid ah, qof aqoon u leh waxbarashada gaarka ah, ama qareen. Haddii cunugaagu ku jiro barnaamij uu maamulo guddi naafo ah oo ka tirsan degmada ama hay'ada kale ee waxbarashada dadweynaha, waa in hay'ada waxbarashada ay kala tashataa guddiga ama hay'ada dib u eegista maamulka.

Marka dib loo eego xaalada, waa in la sameeyaa dadaal kasta si loo xalliyo khilaafka ka jira waxbarashada cunugaaga. Kormeeraha guud (ama qofka loo xilsaaray) wuxuu maqli doonaa labada dhinac ee khilaafka wuxuuna go'aan ka gaari doonaa arrinta. Marka go'aan la gaaro, kormeeraha guud waa inuu kugu ogeysiiyaa, qoraal ahaan, go' aanka. Arrintaan waa inay dhacdaa 20 maalmood gudahood marka ugu horreysa ee aad u sheegto hay'ada waxbarashada arrimaha ku saabsan walaacaaga.

### HABABKA DHEERAADKA AH EE AAD ISKUDAYI KARTO

Haddii aad dhameystirtay nidaamkaan oo adiga iyo hay'ada waxbarashada weli idiin ku qanacsaneyn sida loo xallinaayo dhibaatada, waxaa jira habraac dheeraad ah oo aad isku dayi karto. In kastoo aan lagaaga baahnayn inaad codsato dib u eegis maamul ka hor intaadan sameyn habraac kale ee xallinta khilaafaadka, hadana waa lagu taliyaa. Waxaa jira dookhyo dheeraad ah oo aad isticmaali karto si aad u xalliso dhibaatada. Xafiiska Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba ayaa qayb ka noqon kara oo kaa caawin kara codsigaaga qalab dheeraad ah si aad uga caawiso xallinta walaacaaga. Hay'adaha soo socda ayaa sidoo kale kaa caawin kara:

- Kooxdaada Taageerada Gobalka ee Maxaliga ah (Lambarka Deegaanka____) ee (lambarka taleefoonka_____________). La-talinta waalidka iyo qoyska ee Kooxda Taageerada Gobolka ayaa kula shaqeyn doona.
- La-taliyaha waalidka ee deegaanka, haddii hay'adaada waxbarashadu mid haysato.
    - La-taliyaha waalidka wuxuu bixiyaa macluumaad iyo taageero ay helaan qoysaska ilmaha qaba naafonimada iyo hay'ada waxbarashada. La-taliyaha waalidka waa shaqaale katirsan hay'ad waxbarasho sidoo kalena waa waalid haysta ilmo naafo ah.
    - Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, la xariiir________________________________________.
- Isbahaysiga Ohio ee Waxbarashada Carruurta Qaba Naafonimada (Education of Children with Disabilities, OCECD)
    - OCECD waa urur samafal oo gobolka oo dhan ah ka shaqeeya una adeega qoysaska dhallaanka, ilmaha socod baradka, carruurta, iyo dhalinyarada naafada ah ee Ohio, iyo macaliinta iyo hay'ada siiya adeegyada. Barnaamijyada OCECD waxay ka caawiyaan waalidiinta inay noqdaan wakiilo xog ogaal ah oo wax ku ool ka ah carruurtooda gaar ahaan dhammaan goobaha waxbarashada.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, la xariir OCECD ood kala xariiri karto (740) 382-5452 ama booqo mareegta OCECD oo ah www.ocecd.org.

## Xallinta Cabashada ee Hore

Xallinta cabashooyinka hore waa marka aad isku daydo inaad si aan rasmi ahayn u xalliso kaladuwanaanshaha kaala dhaxeeya hay'ada waxbarashada iyo sida caadiga ah ka hor intaadan bilaabin isticmaalka dookhyada kale ee xallinta khilaafaadka. Qof ka socda Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba ayaa kula shaqeyn doona si uu kaaga caawiyo wax ka qabashada su'aalahaaga iyo walaacaaga ku saabsan waxbarashada cunugaaga.

Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ayaa dhiiligelisa xallinta khilaafka hore kahor inta aadan codsan nidaamka rasmiga ah, sida cabashooyinka qoraalka ah ama dhageysiga caddaalada ah. Waxaad la xiriiri kartaa qof ka tirsan Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba si looga jawaabo su'aalahaaga iyo walaacaaga ku saabsan waxbarashada cunugaaga. Si aad qof ugala hadasho arrimaha ku saabsan xallinta cabashooyinka hore, fadlan la xiriir Waaxda:

- Taleefoonka: (614) 466-2650, ama khadka bilaashka ah ee (877) 644-6338
- Iimaylka: exceptionalchildren@education.ohio.gov

## Fududeynta

Haddii aad ka walaacsan tahay qiimeynta ama dib u qiimeynta cunugaaga ee waxbarashada gaarka ah, ama xog ku saabsan Barnaamijka Waxbarashada Shaqsi ee cunugaaga (IEP), ikhtiyaar la yiraahdo fududeyn ayaa kuu shaqeyn kara.

Fududeynta waa marka aad ka codsato Waaxda inay diyaariso fududeeye inuu ka qeybgalo kulanka qiimeynta cunugaaga ama kooxda IEP-da (sidoo kale waxaad ka tirsan tahay kooxdaan). Hay'ada waxbarashada ayaa sidoo kale ka codsan karta Waaxda fududeeyaha ka qaybgala mid ka mid ah


Ohio Department of Education & Workforce

kulanadaas oo ku lug leh waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga. Adiga iyo hay'ada waxbarashadu waa inaad labadiinuba ku heshiiyaan in fududeeye ka qaybgalo kulanka.

## UJEEDADA FUDUDEYNTA

Fudaydintu waxa ay ka dhex dhacdaa kulan kooxeed, sida kulanka kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsi, kulanka qorshaynta qiimaynta, ama kulanka kooxda qiimaynta. Fudaydiyuhu waa dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah oo aan xubin ka ahayn kooxda wax go'aano ahna uma gaadho kooxda. Helida fududeeye waxay ka caawisaa kooxda inay noqdaan kuwo wax soo saar leh oo diirada saara ardayga. Fudaydiyeyaashu waa dhexdhexaadiyeyaal khubaro ah oo uu ku tababaray OEC gu hannaanada waxbarashada gaarka ah.

Waxaad codsan kartaa fududeynta waqti kasta. Marka aad sidaas sameyso, adiga iyo hay'ada waxbarashada labadiinaba waa inaad aqbashaan inaad ka qaybgashaan. Haddii labadiinaba aqbashaan, Xafiiska Carruurta Baahiyaha Qaba ayaa mid kuu qoondeyn doona. Ma jiro wax kharash ah oo adiga ama hay'ada waxbarashada idin kaga baxaaya fududeynta.

**FUDUDEEYAHA:**



- Wuxuu sii ahaanayaa dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah (ma la safto dhinacyo ama uma shaqeeyo adiga ama hay'ada waxbarashada)
- Waa *dhexdhexaadiye* tababaran oo xirfadle ah (waa qof xirfadle ah oo gacan ka geysta xallinta khilaafaadka)
- Wuxuu maray tababar wuxuuna yaqaan shuruudaha iyo sharciyada waxbarashada gaarka ah
- qayb kama ahan kooxda qiimeynta iyo IEP-da cunugaaga
- Ma gaaro go'aano, laakiin wuxuu kooxda ku hayaa helida xalalka
- Wuxuu gacan ka geystaa dhisida wada sheekeysiga u dhaxeeya adiga iyo hay'ada waxbarashada
- Wuxuu iskuduba ridaa kulanka wuxuuna gacan ka geystaa in qof walba xushmeeyo nidaamka
- Wuxuu ka caawiyaa kooxda inay diirada saaraan cunugaaga iyo baahiyaha cunugaaga

**QODOBO MUHIIM AH OO AY TAHAY IN LA XASUUSTO KUNA SAABSAN FUDUDEYNTA:**

- Fududeynta waa ikhtiyaar.
  - Adiga iyo hay'ada waxbarashada labadiinaba waa inaad ogolaataan inaad qayb ka noqotaan geeddi socodka. Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashadu aad ku heshiisaan inaad heshaan fududeeye ka qaybgala kulanka, taasi micnaheedu maahan inaad ku raacsan tahay hay'ada waxbarashada ee kulanka ama aad ku raacsan tahay sida kulanku loo dhigaayo. Waalidiinta waxaa mar walba loo oggol yahay inay ra'yigooda soo bandhigaan.

- Heshiis kasta oo la gaaro inta lagu guda jiro kulanka fududeynta guud ahaan waa mid ku xiran. Tani waxay la micno tahay in adiga iyo hay'ada waxbarashada labadiinaba ay waajib idinku tahay inaad raacdaan heshiiska ka dib marka go'aanka la isla qaato.
    - Dukumiinti kasta oo adiga iyo hay'ad waxbarasho aad ku saxiixdaan qiimeynta cunugaaga ama IEP waxay leeyihiin muhiim la mid ah dukumiintiyada ay ku saxiixan kulan kasta oo kale oo IEP ama kooxda qiimeynta sameyso.

Si aad u hesho macluumaad badan oo ku saabsan fududeynta, booqo webseedka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio oo ah education.ohio.gov kadibna baar ***fududeyn.***

**Si aad u codsato Fududeynta**

La xariir agaasimaha waxbarashada gaarka ee hay'ada waxbarashada si loo eego in degmadu dooneyso inay ka qaybgasho nidaamkaan, __________ oo lagala xariiri karo____________. Marka labada dhinacba ku heshiiyaan inay ka qaybgalaan fududeynta, fadlan la xariir Waaxda Waxbarashada Ohio iyo Xafiiska Shaqaalaha ee
Carruurta Baahiyaha gaarka ah qaba:

- Adoo kala xariiraya taleefoonkaan: (877) 644-6338
- Iimaylka: OECMediationFacilitation@education.ohio.gov

# Dhexdhexaadinta



Dhexdhexaadintu waa marka adiga iyo hay'ada waxbarashada aad ku heshiisaan inaad heshaan xirfadlayaal dhinac saddexaad ah si ay gacan uga geystaan in la gaaro heshiis ku saabsan waxbarashada ardaygaaga naafada ah ama ardaygaaga *looga shakisan yahay* naafonimada. Dhinac saddexaad waxaa loola jeedaa in qofkaan, oo sidoo kale loo yaqaan dhexdhexaadiye, uusan dhinac la jirsan oo uusan u shaqeynin ama u dhaqmin sida wakiilka waalidka ama hay'ada waxbarashada. Dhexdhexaadintu waa ikhtiyaar adiga iyo hay'adaha waxbarashada haystaan mar kasta oo ay jiraan khilaaf ku lug leh waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga.

## DHEXDHEXAADINTU WAA BILAASH WAXAANA LA CODSAN KARAA WAQTI KASTA

Dhexdhexaadintu waxaa la codsan karaa waqti kasta. Marka dhexdhexaadinta la codsado, adiga iyo hay'ada waxbarashada labadiinaba waa inaad oggolaataan inaad ka qaybqaadataan nidaamka. Haddii aad labadiinuba ogolaataan inaad ka  qaybqaadataan, Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba wuxuu kuu qoondeyn doonaa dhexdhexaadiye. Dhexdhexaadiyuhu kuuma sheegi karo sida ay tahay inaad u xalliso arrinta khuseysa waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga. Taas baddalkeeda, dhexdhexaadiyuhu wuxuu ka caawiyaa labada dhinacba inay ka wada hadlaan walaaca khuseeya cunugaaga oo ay xal u helaan arrinta.

Haddii aad go'aansato cabasho rasmi ah ama aad codsato dhageysi caddaalad ah (eeg bogaga 17-28 aad), Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio waxay ku waydiin doontaa inaad u tixgeliso dhexdhexaadinta tallaabada ugu horreysa. Ma jiro wax kharash ah oo adiga ama hay'ada waxbarashada ku bixinaysaan dhexdhexaadinta.


Ohio Department of Education & Workforce

| Codsiga Dhexdhexaadinta | Helida Dhexdhexaadiyuhu iyo Qabashada Ballanta Kulanka | Kulanka Dhexdhexaadinta | Gaarista Heshiiska | Heshiiska Lama Gaarin |
|---|---|---|---|---|
| Adiga ama degmo dugsiyeedka ayaa ka codsan karta Waaxda Shaqaalaha iyo waxbarashada ee Ohio dhexdhexaadin waqti kasta. Haddii aad gudbiso cabasho ama aad codsato dhageysi caddaalad ah, Waaxda ayaa bixin doonta dhexdhexaadin ah tallaabada koowaad. Labadiinaba adiga iyo degmada waa inaad aqbashaan isticmaalida dhexdhexaadinta. | Dhexdhexaadiyuhu waa dhinac dhexdhexaad ah. Dhexdhexaadiyuhu wuxuu qaban doonaa ballan kulan sida ugu dhaqsaha badan. Waaxda ayaa kharashka siisa dhexdhexaadiyaha. | Adiga iyo degmo dugsiyeedka labadiinaba waxaad wadaagaysaan walaacyada. Dhexdhexaadiyaha ayaa iskudayi kara inuu xalliyo khilaafka iyo soo saarista, heshiis qoraal ah oo rasmi ah. Caadiyan, majirayaan wax kulanka lagu wadaago oo cid banaanka ah lala wadaagi karo ama looma adeegsan karo dhageysiyada sharciga ee mustaqbalka, ilaa dhaafitaano kale lagu saleeyo maahee. | Heshiiska qoraalka ah waa mid waajib ah, oo adiga iyo degmada labadiinaba saxiixaysaan. Waajib waxaa loola jeedaa waa in adiga iyo dugsiga raacdaan heshiiska, maxkamaduna ay qasab ku meel marin karto. | Haddii aan heshiis lagu gaarin dhexdhexaadinta, aadna gudbiso cabasho gobal, markaas Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba ayaa xallin doona cabashada. Haddii aan heshiis lagu gaarin dhexdhexaadinta aadna gudbiso dhageysi caddaalad, markaas dhageysiga cadaalada aha ayaa marka xigta la qaban doonaa. |

## DHEXDHEXAADIYAHA:

- Wuxuu sii ahaanayaa dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah (ma la safto dhinacyo ama uma shaqeeyo adiga ama hay'ada waxbarashada)
- Looma oggola inuu gaaro go'aano; taas badelkeedana, dhexdhexaadiyuhu wuxuu kaa caawinayaa adiga iyo hay'ada waxbarashada inaad xallisaan dhibaatada ka jirta waxbarashada cunugaaga.
- Wuxuu la shaqeynayaa adiga iyo hay'ada waxbarashada si aad u go'aamisaan heshiiska dhexdhexaadinta ee qoraalka ah
- Wuxuu iskuduba ridaa kulanka dhexdhexaadinta wuxuuna gacan ka geystaa in qof walba xushmeeyo nidaamka
- Wuxuu qof walba ka caawiyaa diirad saarista ardayga iyo baahiyaha ardayga
- Wuxuu gacan ka geystaa dhisida wada sheekeysiga u dhaxeeya adiga iyo hay'ada waxbarashada

**QODOBO MUHIIM AH OO AY TAHAY IN LA XASUUSTO KUNA SAABSAN DHEXDHEXAADINTA**

- Dhexdhexaadinta waa ikhtiyaari.
  - Adiga iyo hay'ada waxbarashada labadiinaba waa inaad ogolaataan inaad qayb ka noqotaan geeddi socodka. Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashadu aad ku heshiisaan inaad heshaan dhexdhexaadin, taasi micnaheedu maahan inaad ku raacsan tahay hay'ada waxbarashada ee kulanka ama aad ku raacsan tahay sida kulanku loo dhigaayo.
- Dhexdhexaadintu waa qarsoodi.
  - Wax kasta oo lagu sheego kulanka dhexdhexaadinta guud ahaan waa mid qarsoodi ah (gaar ah) oo aan la isticmaali karin hadhow, haddii aan dhaafitaano jirin.



Ohio Department of Education & Workforce

- Heshiis kasta oo qoraal ah oo la gaaro inta lagu guda jiro dhexdhexaadinta guud ahaan waa waajib ah. Tani waxay ka dhigan tahay in adiga iyo hay'ada waxbarashada labadiinaba ay waajib idinku tahay inaad raacdaan heshiiska qoraalka ah ka dib marka go'aanka la isla qaato.
    - Dukumiinti kasta oo adiga iyo hay'ad waxbarasho aad ku saxiixdaan qiimeynta cunugaaga ama IEP waxay leeyihiin muhiim la mid ah dukumiintiyada ay ku saxiixan kulan kasta oo kale oo IEP ama kooxda qiimeynta sameyso.

**Si aad u codsato Dhexdhexaadinta**

La xariir agaasimaha waxbarashada gaarka ee degmo dugsiyeedka si loo eego in degmadu dooneyso inay ka qaybgasho nidaamkaan ________oo lagala xariiri karo________. Marka labada dhinacba ku heshiiyaan inaad ka qaybgashaan dhexdhexaadinta, fadlan la xariir Waaxda Waxbarashada Ohio iyo Xafiiska Shaqaalaha ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba:

- Adoo kala xariiraya taleefoonkaan: (877) 644-6338
- Iimaylka: OECMediationFacilitation@education.ohio.gov

## Gudbinta Cabashada Gobolka

Dookh kale oo laguu heli karo, haddii aad walaac ka qabto waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga, waa inaad cabasho rasmi ah oo qoraal ka gudbiso hay'ada waxbarashada oo aad u gudbiso cabashadaan Xafiiska Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Waaxda Waxbarashada ee Ohio ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba.

### MAJIRAAN KHIDMAD LA ISKAGA QAADAAYO GUDBINTA CABASHADA RASMIGA AH

Majiraan khidmad la iskaga qaadaayo gudbinta cabashada. Nidaamka cabashada gobolka guud ahaan wuxuu xalliyaa dhibaatada si ka dhakhso badan dhageysiga nidaamka oo ka yar cadaawad (ama iska hor imaadka) dhageysiga nidaamka caddaalada ah. Si aad u gudbiso cabasho gobol, waa inaad u dirtaa cabashadaada oo saxiixan, qoraal ah (nooca asalka ah) Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba, waana inaad *nuqul* ka mid ah cabashada si toos ah ugu dirtaa hay'ada waxbarashada.

Cabashadaadu waa inay ku jiraan bayaan ku saabsan xadgudubka la sheegay oo ku saabsan shuruudaha waxbarashada gaarka ah ee federaalka ama kuwa gobolka (xadgudubka la sheegay ee Sharciga Waxbarashada Dadka Naafada ah ama Heerarka Hawlgalka Ohio ee Waxbarashada Carruurta Naafada ah). Cabashada uma baahna in lagu daro magaca ama muujinta sharci gaar ah, laakiin waa inaysan noqon tallaabo gaar ah ama qaadid la'aanta talaabada hay'ada waxbarashada ee aad aaminsan tahay inay ku xadgudubtay shuruuda waxbarashada gaarka ah. Sidoo kale, waa inaad ku dartaa xaqiiqooyinka cabashada si aad muujiso sababta aad ugu malaynayso in hay'adaada waxbarashada ay ku xadgudubtay shuruudaha waxbarashada gaarka ah.

### DIB U EEGISTA CABASHADA RASMIGA AH

Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba ayaa dib u eegi doona, in loo baahdo, baaraya cabasho si sax ah loo gudbiyay kadibna wuxuu go'aamiyaa in hay'ada waxbarashada ay ku xadgudubtay shuruud waxbarasho oo gaar ah oo la xiriirta waxbarashada cunugaaga. Sidoo kale, dhinac saddexaad – oo ah, qof aan adiga ahayn, ama hay'ad ama urur aan ahayn hay'ada waxbarashada – ayaa dacwad gobolka

ah u gudbin karta Waaxda haddii ay aaminsan tahay in hay'ada waxbarashada ay jabisay shuruud waxbarasho oo gaar ah oo khuseysa arday.

Cabashada rasmiga ah waxaa loo gudbin karaa Waax kasta waqti kasta inta *hal sano* ee xadgudubka waxbarashada gaarka ah. Cabasho kasta oo ka soo horjeeda xadgudubyada dhaca in ka badan hal sano laga bilaabo taariikhda cabashada la soo gudbiyay lama baari doono/lama xallin doono.

## SIDA LOO GUDBIYO CABASHADA RASMIGA AH

Haddii aad dooneyso inaad cabasho rasmi ah u gudbiso gobolka oo ku saabsan waxbarashada gaarka ah, waa inaad:

- buuxiso foomka cabashada rasmiga ah ee webseedka Xallinta Khilaadka ee DEW; ama
- Qortaa warqad cabasho ah oo u dirtaa Waaxda boostada ama iimaylka; ama
- Wacdaa shaqaalaha Waaxda Carruurta Baahiyaha Gaarka ah 1-877-644-6338 waana inay codsato foom cabasho ah, oo aad buuxin doonto oo aad ku celin doono Waaxda.

**Calaamadee liiska waxyaabaha aad Ku Dareyso cabashada Rasmiga ah**

- Bayaan sheegaya in hay'ada waxbarashadu ay ku xadgudubtay shuruudaha waxbarashada gaarka ah ee dawlada dhexe ama kuwa gobolka
- Sharaxaad ku saabsan dhibaatada, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xariira cabashadaada
- Xogtaada xiriirka iyo saxiixa asalka ah
- Haddii aad ka dacwooneyso xadgudub waxbarasho gaar ah oo ku saabsan arday gaar ah
- Magaca iyo ciwaanka meesha ardaygu degan yahay
- Magaca dugsiga ardaygu dhigto
- Haddii ilmuhu ama qofka dhallinyarada ah guri la'aan yahay (sida lagu qeexay Xeerka Caawimaada Hoy la'aanta ee McKinney-Vento), macluumaadka xiriirka ee la heli karo ee ardayga iyo magaca dugsiga uu ardaygu dhigto
- Sharaxaad ku saabsan nooca dhibaatada, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka dhibaatada
- Soo jeedinta xallinta dhibaatada ilaa inta la og yahay loona heli karo dhinaca
- waqtiga cabashada lasoo gudbinaayo
- Cabashadu waa inay leedahay saxiix.

*Ogsoonoow inaan cabashooyinka qarsoodiga ah aan la aqbali doonin.*

## MEESHA LOO DIRI CABASHADA

Cabashadaada waa inaad usoo dirtaa *labadaba* Waaxda Waxbarashada Ohio iyo Xafiiska Shaqaalaha ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba iyo kormeeraha hay'ada waxbarashada isku mar.

Cabashada rasmiga ah u dir:
Xafiiska Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba
Tixraac: Kaaliyaha Maamulaha Qaybta Xallinta Khilaafaadka
25 South Front Street, Mail Stop 409
Columbus, Ohio 43215-4183
Iimaylka: oeccomplaints@education.ohio.gov


Ohio Department of Education & Workforce

**JOOJINTA**
Joojinta waxaa loola jeedaa hakinta xaalada cabashada. Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashadu aad qayb ka tihiin dhageysiga nidaamka caddaalada ah, iyo adiga ama hayada waxbarashada sidoo kale cabasho rasmi ah oo ku saabsan isla arrimaha, Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ayaa cabashada rasmiga ah hakin doonta. Si kale haddii loo dhigo, Waaxda ayaa sugi doonta ilaa howsha saxda ah ay dhammaato ka hor inta aan la xalin cabashadaada rasmiga ah. Haddii aad ka laabato codsigaaga dhageysiga caddaalada ah, Waaxda ayaa ka qaadi doonta cabashada rasmiga ah si aan waafaqsanayn waxayna sii wadi doontaa xallinta cabashadaada.

Haddii dhageysiga caddaalada uu dhaco oo uu g'aan ka gaaro sarkaalka dhageysiga dacwada (impartial hearing officer, IHO), markaas Waaxda ayaa cabashada rasmiga ah ka qaadi doonta ka tanaasulid la'aan si ay u xalliso kaliya haddii arrimuhu weli ku sii jiraan cabashadaada oo aan go'aan ka gaarin sarkaalka dhageysiga.

## NIDAAMKA CABASHADA RASMIGA AH
Marka waaxdu hesho cabashadaada rasmiga ah, haddib si sax ah loo xareeyay, waxay bilaabi doontaa inay dib u eegis ku sameyso, marka loo baahdo, waxay baartaa xadgudubyada lagu eedeeyay shuruudaha waxbarashada gaarka ah. Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba waa inuu ku xalliyaa cabashada 60 maalmood gudahood oo laga bilaabaayo taariikhda uu helay cabashadaada.

Ayadoo qayb ka ah nidaamka Cabashada Rasmiga ah, Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba ayaa:

- Dib u eegi doonta cabashadaada oo go'aamin doonta inay awood u leedahay inay xalliso eedaha ku jira cabashadaada
- U sheegi doona adiga iyo hay'ada waxbarashada qoraal ahaan eedeymaha ay xallin doonto, oo ay ku jiraan baaritaanka (haddii loo baahdo)
- Soo bandhigi doona dhexdhexaadin ama hawl-fududeyn labadiina adiga iyo hay'ada waxbarashada si ay u noqoto hab kale oo lagu xalliyo cabashada
- Dalban doona macluumaad dheeraad ah oo ay uga baahan karto adiga iyo hay'ada waxbarashada ee ku saabsan eedeymaha ku jira cabashadaada
- Dib u eegi doonaa dukumiintiyada dheeraadka ah iyo macluumaadka adiga iyo hay'ada waxbarashada bixisaan, samee wareysiyada taleefoonka, oo booqo hay'ada waxbarashada cunugaaga, sida muhiimka ah ee go'aanka
- Bixin doonta hay'adaada waxbarashada fursad aad uga jawaabto cabashadaada oo ay ku bixiso xall
- Qori doonta warqad ku ogeysiinaysa adiga iyo hay'ada waxbarashada labadaba go' ankeeda ku saabsan in xadgudub waxbarasho oo gaar ah uu dhacay (ka dib markii la soo gabagabeeyay dib u eegis iyo baaritaanada, haddii loo baahdo, muddo aan ka badnayn 60 maalmood oo laga bilaabaayo taariikhda ay heshay cabashadaada)

**WAQTIYADA DHEERAADKA AH**
Waaxdu waxay haysan kartaa in ka badan 60 maalmood si ay u xalliso cabashada oo ay warqadda ugu soo saarto go'aankeeda, haddii ay jirto muddo kordhin. Kordhinta jadwalka 60-ka maalmood ee xallinta cabashada rasmiga ah ayaa la sameyn karaa marka:



Department of Education & Workforce

- Adiga iyo hay'ada waxbarashada ayaa isku raacsan waqti dheeraad ah si aad labadiinaba iskugu darydaan inaad ku xallisaan dhibaatada nidaamka dhexdhexaadinta, fududeynta, ama hab kale oo lagu xalliyo khilaafaadka kale, ama marka
- Ay jiraan duruufo gaar ah (oo uu go'aamiyay Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba oo ku saleysan kiis-ka-kiis).

**BUUXINTA AAN HABBOONEYN**

Haddii Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba uu go'aamiyo inaadan si sax ah u gudbin cabasho rasmi ah sababo la xariira inaadan ku darin dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ee ku saabsan arrinta aad dooneyso inaad xalliso, ama haddii Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba uusan awood u lahayn inuu baaro cabashada, Xafiiska Carruurta Baahiyaha Gaarka ah wuxuu kuu soo diri doonaa warqad sharraxaysa sababta aysan u dhaqaaqin xallinta cabashadaada, sababta go'aankan, iyo macluumaadka khuseeya, haddii aad u baahan tahay inaad ku darto cabasho cusub.

**DIB USOO GUDBINTA CABASHADA**

Haddii aad cabashada dib ugu gudbineyso kuna soo dareyso macluumaad cusub, hubi inaad cabashada u dirto Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio iyo hay'ada waxbarashada hal sano gudahood marka xadgudubka waxbarashada gaarka ah ee la sheegay uu dhacay. Haddii aad ku dartay arrimo cusub cabashadaada oo Waaxda aysan lahayn awood ay ku xalliso, waxay kuu gudbin doontaa ilo si wax looga qabto arrimahaan, sida ku habboon.

**Buuxinta Cabashada**

- Dacwad lasoo xareeyay isla sanadka gudahiisa kuna saabsan xadgudub laga dacwoonaayo.
- Waalidku wuxuu foomka asalka ah siiyaa Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha Ohio iyo nuqul ka mid ah hay'ada waxbarashada.
- Cabashadu waxay ku saabsan dacwad ah xadgudubyada shuruudaha waxbarashada gaarka ah iyadoo la adeegsanayo xaqiiqooyin taageeraya.

**Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ayaa dib u eegis ku sameysay Cabashada**

Waaxdu waxay warqad qirasho ah u dirtaa qofka cabashada gudbiyay iyo hay'ada waxbarashada.

Waaxdu waxay soo dirtaa warqad ku filnaansho la'aan haddii cabashada aan si habboon loo xareyn, ama haddii wasaaradu aysan awood u lahayn inay xalliso cabashada.

**Dib u eegista**

Wasaaradu waxay dib u eegis ku sameysaa dhammaan dukumiintiyada waxayna codsadaan dukumiinti/macluumaad dheeraad ah haddii loo baahdo.

Waaxdu waxay wareysi ka qaadaa shaqsiyaadka ku habboon hawsha, marka loo baahdo.

**Waaxdu waxay dirtaa Warqad Lagu Raadinaayo Xaqiiqooyin**

Waaxdu waxay go'aan ka gaartaa eedeymo kasta iyo haddii uu jiro xadgudub waxbarasho oo gaar ah.

Waaxdu waxay soo saartaa tallaabooyinka xallinta marka hay'ada waxbarashada lagu helo inay sameysay xadgudub.

## Muddada Gudbinta Nidaamka Cabashada



Mid ka mid ah qaababka aad u xallin karto walaacyada qaarkood ee ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga ee hay'ada waxbarashadooda waa inaad si toos ah ugu gudbiso codsi ku saabsan dhageysiga dacwada caddaalada ah hay'ada waxbarashada, adoo sidoo kale nuqul u gudbinaaya Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio. Marka aad sidaan sameyso, waxaad soo gudbisay cabasho ku saabsan nidaamka caddaalada (sidoo kale waxaa loogu yeeraa codsiga nidaamka caddaalada ah).

Waxaa jira dad kale oo soo gudbin kara cabashada habraaca ee habboon:

- Ardayga, haddii uu ugu yaraan jiro 18 sano
- Hay'ada waxbarashada

## SABABAHA LOO GUDBINAAYO

Cabashooyinka nidaamka xuquuq dhowrka ayaa loo gudbin karaa walaacyada khuseeya meelaha soo socda ee waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga:

- Aqoonsiga ilmaha naafada ah
- Qiimeynta ilmaha naafada ah
- Meeleynta Goobta waxbarashada ee ilmaha naafada ah
- Siinta waxbarashada guud ee ku habboon ee bilaashka ah (FAPE) cunugaaga

Cabashada nidaamka caddaalada ah waa inuu dhigaayo in shuruudaha waxbarashada gaarka ah ee federaalka ama kuwa gobolka lagu xadgudbay waana in lagu soo gudbiyaa *labo sano gudahood* laga bilaabo taariikhda waalidka (ama hay'ada waxbarashada dadweynaha ee xareynayso cabashada) ay ogaadeen ama ay ahayd inay ogaadaan xadgudubka waxbarashada gaarka ah ee la sheegay. Mar kasta oo ay Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha Ohio ay hesho cabasho ku saabsan nidaamka caddaalada, waalidiinta iyo hay'ada waxbarashada ee ku lug leh waa inay fursad u helaan inay ka qaybqaataan dhageysiga dacwada. Dhageysiga dacwadda waa dacwad rasmi ah oo ay wasaaradu u xilsaartay sarkaal dhageysi si uu u qabto dhageysi lagu xallinayo cabashada dacwada.

## MACLUUMAADKA LAGU DARO

Waaxdu waxay bixisaa foom loo adeegsan karo dhageysiga dacwada caddaalada ah. Qofka ama hay'ada waxbarashada dadwaynaha ee soo gudbinaysa codsiga waa inaysan adeegsan Foomka Waaxda, laakiin qofkaas ama ururkaas waa inuu wali ku daraa macluumaadka loo baahan yahay marka ay gudbinayaan cabashada nidaamka dacwada:

1. Magaca ardayga
2. Ciwaanka ardayga ama xogta xiriirka
3. Magaca hay'ada waxbarashada
4. Haddii ilmuhu hooy la'aan yahay, xogta xiriirka ee la heli karo ee ilmaha iyo magaca dugsiga cunugaagu dhigto.
5. Qeexitaanta dhibaatada gaarka ah ee cunugaagu wajahaayo, iyo sidoo kale xaqiiqooyin ku saabsan dhibaatada
6. Fikradaha ama soojeedinada si loo xalliyo dhibaatada

Cabashada nidaamka dacwada loo baahan yahay waa inay leeyihiin isla macluumaadka faahfaahsan sida cabashada rasmiga ah (eeg bogga 16 aad); hase yeeshee, saxiixa asalka ah looma baahna. Waxaa loogu gudbin karaa hay'ada waxbarashada iyo Waaxda ayadoo loogu gudbinaayo si shaqsi, boostada, fakiska, ama iimaylka. Caqabadaha aan lagu darin cabashadaada dacwadaada rasmiga ah dib uma eegi doono sarkaalka dhageysiga inta lagu jiro muddada dhageysiga dacwada.

### WAX KA BADELKA CABASHADA NIDAAMKA DACWADA

Wax ka badelka cabashada nidaamka dacwada ayaa cusbooneysiinaya cabashada ka dib markii horey loogu soo gudbiyay Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio. Waxaad wax ka badeli kartaa cabashadaada nidaamka caddaalada ah oo keliya haddii:

- Dhinaca kale uu aqbalo in wax laga badelo nidaamka cabashada, ayadoo loo maraayo hab qoraal ah, lana siiyo fursad lagu xalliyo cabashada iyadoo loo marayo kulan xallinta (kulanka xallinta khilaafka waxaa lagu sharaxay bogga 23 aad), ama
- Sarkaalka dhageysiga dacwada bixiyo oggolaansho. Sarkaalka dhageysiga dacwada uu oggolaansho siin karo ilaa shan maalmood ka hor inta aan la bilaabin dhageysiga dacwadda, laakiin ah muddo aan ka dambeyn waqtigaas.

# Nidaamka Dhageysiga iyo Waqtiyada Dacwada

Haddii aad dacwad ku soo oogto hay'ada waxbarashada ee cunugaaga, muddo 10 maalmood gudahood ka dib marka ay hesho cabashadaada nidaamka caddaalada ah, hay'ada waxbarashada waa inay ku siiso ogeysiis qoraal ah ama jawaab ku saabsan xadgudubka waxbarashada gaarka ah ee aad ka cabanayso, ilaa hay'ada waxbarashada ay horey u bixisay ogeysiis noocaas ah maahee.

Ogeysiiska qoraalka ee hordhaca ah ee ay hay'ada waxbarashada ay ku siineyso waa inuu ka kooban yahay:

- Qeexitaan ku saabsan tallaabada codsigaaga ama nidaamka cabashada inuu ku saabsan yahay. Tani waxay noqon kartaa tallaabo ay hay'ada waxbarashada dooneysay inay qaadato ama tallaabo ay diiday inay qaado. Hay'ada waxbarashadu sidoo kale waa inay ku sharaxdaa jawaabteeda sababta dugsigu u doonayay inuu qaado tallaabada ama u diido inuu qaado talaabada.
- Qeexitaan ku saabsan dhammaan qaababka ay u isticmaashay qiimeynta cunugaaga, diiwaanada ku saabsan cunugaaga, iyo warbixinta hay'ada waxbarashada ee loo adeegsaday inay go'aan ka gaarto inay qaadato tallaabada ama aysan qaadin tallaabada
- Qeexitaan ku saabsan dookhyada kale ee kooxda IEP-da ee loo tixgeliyey cunugaaga iyo sababta ay u diiday dookhyadaas
- Qeexitaan ku saabsan arrimaha kale ee ku habboon go'aanka hay'ada waxbarashada ee ah inay qaadato ama aysan qaadin tallaabo

Hay'ada waxbarashada sidoo kale waa inay ku siiso macluumaad ku saabsan caawimaad sharci oo bilaash ah ama qiimo jaban  ah iyo adeegyada kale ee la xiriira oo aad heli karto.

Haddii cabasho lagugu soo oogo ka waalid ahaan, waa inaad ka jawaabtaa cabashada muddo 10 maalmood gudahood ah. Jawaabtaadu waa inay si gaar ah awooda u saareyso arrimaha lagu soo bandhigay nidaamka cabashada.

## Isku filnaanshaha

Nidaamka cabashada caddaalada ah looma tixgelin doono inuu yahay mid isku filan (taasoo la micno ah inaan si sax ah loo soo gudbin) *Ilaa in* dhinaca kale ogeysiiyo maahee sarkaalka dhageysiga dacwada iyo dhinaca soo gudbiyay cabashada ee qaba eedaha ah inaan la buuxin shuruudaha xareynta (tusaale ahaan, inaan lasoo gudbin xog ku filan). Dhinac kale waa inuu su'aal ka keeno ku filnaanshaha nidaamka cabashada, ayadoo loo maraayo hab qoraal ah, 15 maalmood gudahood ka dib markii cabashada nidaamka dacwada la helay.

Tusaale ahaan, haddii aad u gudbiso cabasho dacwad hay'adaada waxbarashada (oo aadna nuqul u gudbiso Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio), waxaa loo tixgelin doonaa cabasho buuxda ilaa in hay'ada waxbarashada ay u sheegto sarkaalka dhageysiga, ayadoo u mareysa hab qoraal ah, 15 maalmood gudahood, in aysan u maleyneyn in codsigaaga si sax ah loo soo gudbiyay. Ka dib, sarkaalka dhageysiga dacwada wuxuu haystaa shan maalmood gudahood oo laga bilaabaayo marka uu helo ogeysiiska qoraalka ah ee ay soo dirtay hay'ada waxbarashadaada si uu u go'aamiyo in



Ohio Department of Education & Workforce

cabashadaada nidaamka dacwada yahay in buuxa iyo in kale (uuna buuxiso shuruudaha cabashada dacwada ee lagu aqoonsaday bogga 22 aad). Sarkaalka dhageysiga dacwada sidoo kale waa inuu go'aankiisa u diraa adiga iyo hay'ada waxbarashada, asagoo u maraya hab qoraal ah, 15 maalmood gudahood.

Haddii sarkaalka dhageysiga dacwada uu go'aamiyo in cabashadaada aysan buuxin, waxaad fursad u haysataa inaad dib u soo gudbiso cabasho cusub oo habboon ama inaad wax ka badesho cabashada nidaamka caddaalada ah, haddiiba hay'ada waxbarashada ay oggolaato oo ay hesho fursad khilaafka loogu xalliyo kulanka xal raadinta ama sarkaalka dhageysiga dacwada oggolaanayo wax ka yar shan maalmood ka hor inta aan la bilaabin dhageysiga.

Haddii aad isbadelka saxda ah ku sameyso cabashada rasmiga ah, markaas waxaa bilaabanaya muddada xallka ee 30-ka maalmood ah oo laga bilaabaayo marka faylka cabashada wax laga badelo.

**Dhageysiga Dacwada ee Rasmiga ah waxaa qabta Sarkaalka Dhageysiga Dacwada Caddaalada ah**

Marka aan la xallin karin cabashada, waxay horseedi doontaa dhageysiga rasmiga ah ee uu qabto sarkaal dhageysiga caddaalada. Sarkaalka dhageysiga caddaalada ah waa inuu ahaadaa qareen ay tababartay Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio si uu u qabto dhageysiga caddaalada ah.

Hay'ada waxbarashada waxay bixinaysaa kharashka sarkaalka dhageysiga caddaalada ah; Hase yeeshee, shaqsigaan waa mid dhexdhexaad ah, dhinac saddexaad ah waxaana loo doortaa si bakhtiyo nasiib ah. Isaga ama iyadu uma shaqeeyaan hay'ad waxbarasho oo ku lug leh waxbarashada mana lahaan karaan dano shaqsiyeed ama kuw xirfad oo keeni kara inay u hiiliyaan dhinac kamid ah labada dhinac.

Intaa waxaa sii dheer, sarkaalka dhageysiga dacwada si fiican ayuu u yaqaan shuruudaha waxbarashada gaarka ah, oo ay ku jiraan kuwa IDEA, sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka iyo xeerarka iyo sida maxkamaduhu u fasiraan kiisaska waxbarashada gaarka ah.

Kadib dhageysiga, sarkaalka dhageysiga dacwada ayaa qori doonaa go'aan ayagoo ku saleynaaya xeerarka sharciga ee rasmiga ah.

## Muddada Xallinta

Muddada xalka waa waqtiga u dhexeeya xareynta cabashad iyo dhageysiga dacwada ee rasmiga ah. Muddada xalka waxaa ku jira kulan la qabanaayo oo bixiya fursado, mar kale, si loo xalliyo khilaafka waxbarashada gaarka ah ka hor inta dhageysiga si rasmi ah u bilaaban. Haddii aad xareyso cabasho rasmi ah laakiin aad ku guuldareysato inaad ka qaybgasho nidaamka xal raadinta, tani waxay dib u dhigi doontaa bilowga nidaamka dhageysiga dacwada (xog badan oo ku saabsan jadwalka ayaad hoos ka helaysaa).

Muddada xal raadinta waa 30 maalmood oo laga bilaabaayo taariikhda cabashada lasoo gudbiyay (ama laga bilaabaayo taariikhda cabashada si sax ah wax looga badelay). Haddii hay'ada waxbarashada aysan u xallin cabashada rasmiga ah qaab aad ku qanacdo muddada 30 ka maalmood ahna la dhaafo, dhageysiga dacwada ee rasmiga ah ayaa bilaaban kara. Marka muddada xal raadinta ee 30-ka maalmood ah dhammaato, waxaa jira jadwal 45-maalmood ah oo loogu talagalay dhageysiga dacwada iyo sarkaalka dhageysiga dacwada uu ku gaaro go'aan (eeg bogga 22 aad), ilaa in adiga iyo hay'ada waxbarashadu ku heshiisaan maahee nidaama dhexdhexaadinta ee dhaafaya 30 maalmood. Sidoo kale oysoonoow in muddada xal raadinta ee 30-ka maalmood ay dhamaan karto xili hore haddii, inta lagu jiro 30-kaas maalmahaas, adiga iyo hay'ada waxbarashada aad qaab qoraal ah ku heshiisaan in heshiis uusan macquul ahayn oo aan la gaari karin.

Inta lagu jiro muddada 30-ka maalmood ee xal raadinta, iyo inta lagu jiro 15-ka maalmood ee ugu horreeya ka dib marka la helo cabashada, hay'ada waxbarashada waa inay jadwal u sameysaa kulan xal lagu raadinaayo. Haddii hay'ada waxbarashada aysan qaban kulanka xalka lagu raadinaayo 15 maalmood gudahood ama aysan ka qeybgalin kulanka xal raadinta, waxaad ka codsan kartaa sarkaalka dhageysiga dacwada inuu bilaabo jadwalka dhageysiga ee 45-maalmood ah. Hay'ada waxbarashada looma baahna inay jadwal u qabato kulan xal lagu raadinaayo haddii ay soo gudbiso cabashada dacwada rasmiga ah.

## KULANKA XAL RAADINTA

Ujeedada kulanka xal raadinta ayaa ah in aad fursad siiso in aad kala hadasho dhibaatooyinka cabashada keenay iyo in hay'ada waxbarashada ay fursad u hesho inay kaala shaqeyso xallinta. Mas'uuliyadu waxay saaran tahay hay'ada waxbarashada si ay u qabato ballanta kulanka xal gaarista, waxaana lagaa rabaa inaad ka qayb gasho. Haddii aadan ka qaybgalin kulanka xal raadinta hay'ada waxbarashadu waxay caddeyneysaa ka qaybgal la'aantaada, hay'ada waxbarashaduna waxay ka codsan kartaa sarkaalka dhageysiga dacwada inuu joojiyo cabashadaada nidaamka caddaalada dhammaadka muddada 30-maalmood ah.

Adiga iyo hay'ada waxbarashada ayaa go'aan ka gaaraya xubnaha kooxda IEP-da ee ay tahay inay ka qeyb galaan kulanka xal raadinta. Kulankaan waa inuu ka qaybgalaa wakiil hay'ad waxbarasho ka socda oo awood u leh inuu go'aan u gaaro hay'ada waxbarashada.

Qareenka hay'ada waxbarashada kama qeyb geli doono kulankaan haddii aadan dooran inaad qareenkaaga ka qaybgalo. Kulankaan waa talaabo looga baahan yahay nidaamka xal raadinta haddii adiga iyo hay'ada waxbarashadu aad ku heshiisaan hab qoraal ah inaad ka tanaasushaan kulanka xal raadinta, ama adiga iyo hay'ada waxbarashadu aad ku heshiisaan inaad adeegsataan nidaamka dhexdhexaadinta badelka kulanka xal raadinta. Adiga iyo hay'ada waxbarashada waxaa la idiin oggol yahay inaad dhexdhexaadin sameysaan muddada 30-maalmood ee go'aanka haddii aad labadiinuba ogolaadaan inaad sidaas sameysaan. Arrintaan waxay ka hortagi doontaa dhageysiga iyo waqtiga go'aanka 45-maalmood.

Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashada aad xalisaan khilaafaadka aadna ku xalisaan kulanka xallinta, labadiinaba waa inaad saxiixdaan heshiis sharci ah oo:

- Faahfaahinaaya waxa hadda dhici doona ahna qoraal
- adiga iyo wakiilka hay'ada waxbarashada aad saxiixdeen
- Maxkamadu fulin karto

Heshiiska sharciga ah waxaa loola jeedaa in haddii adiga ama hay'ada waxbarashada idiin ku socon heshiiska,  in maxkamadu ay u baahan karto adiga ama hay'ada waxbarashada inaad sidaas sameysaan.

Haddii adiga ama hay'ada waxbarashada midkiin go'aansado inuusan aqbalin heshiiska kadib saxiixida heshiiska, midkiin ayaa joojin kara heshiiska saddex maalmood oo shaqo gudahood ka dib markaad saxiixdaan.

Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashada aad heshiis ka gaartaan cabashada ka hor inta aan la gaarin muddada xallinta 30-ka maalmood ah, cabashada waa la xiri doonaa mana la qaban doono dhageysiga cadaalad ah.

## Nidaamka Dhageysiga

Dhageysiga nidaamka caddaalada ah waa in loo qorsheeyaa oo lagu sameeyaa meel iyo waqti macquul u ah adiga iyo hay'ada waxbarashada. Sarkaalka dhageysiga dacwada ayaa la soo xiriiri doona adiga iyo hay'ada waxbarashada isla waqtigaas marka loo baahdo isgaarsiinta inta lagu jiro nidaamka dhageysiga dacwada. Si kale haddii loo dhigo, dhammaan heshiisyada u dhexeeya sarkaalka dhageysiga dacwada, adiga, iyo hay'ada waxbarashada ayaa si wadajir ah u dhici doona mana loo gaari doono si gooni ah.

Muddada Jadwalka 45-ta maalmood ah waxaa ka mid ah dhageysiga dacwada caddaalada ah iyo muddada sarkaalka dhageysiga si loo gaaro go'aan. Muddada dhageysiga ee 45-ta maalmood ah waxay bilaabmaysaa ka dib marka nidaamka xallinta 30-maalmood ay dhammaato, ama ka dib mid ka mid ah waxyaabaha soo socda marka ay dhacaan:

- Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashada aad qoraal ahaan isku raacdaan inaad ka tanaasushaan (inaan la qaban) kulanka xal raadinta, ama
- Marka aad billoowdaan inaad ka wada hadashaan arrimaha kulanka xallinta ama kulanka dhexdhexaadinta, adiga iyo hay'adda waxbarashaduna aad ku heshiisaan qaab qoraal ah inuusan wax heshiis ah suurtagal ahayn, ama
- Haddii adiga iyo hay'ada waxbarashadu aad ku heshiisaan qoraal ahaan inaad ka gudubtaan muddada xal raadinta ee 30-ka maalmood ah si loo sii wado nidaamka dhexdhexaadinta, ka dibna adiga ama hay'ada waxbarashadu ka baxdo habka dhexdhexaadinta.

Ilaa sarkaalka dhageysiga dacwada uu ogolaado maahee inuu bixiyo waqti dheeraad ah (ama si kale haddii loo dhigo, inuu bixiyo maahee oggolaansho dheeraad ah), kadib marka uu codsado mid kamid ah dhinacyada dacwada muddo 45-maalmood ah, arrimahaan soo socda ayaa dhici doona.

- Dhageysiga waa in la qabto.
- Go'aanka dhageysiga waa in la gaaro.; iyo
- Nuqulka go'aankana waa in loo diro ayadoo la adeegsanaayo boosto la xaqiijiyay labadiinaba adiga iyo hay'ada waxbarashada, iyo sidoo kale Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio.

Ugu yaraan shan maalmood ka hor dhageysiga dacwada, adiga iyo hay'ada waxbarashada waa inaad ka qaybgashaan shirka shaacinta. Kani waa wada hadal si loo hubiyo in adiga iyo ha'ada waxbarashada labadiinaba aad hesheen macluumaadka lagu soo bandhigi doono dhageysiga.

### XUQUUQAHA DHAGEYSIGA

Marka la qabanaayo dhageysiga dacwada caddaalada ah, waxaad xaq u leedahay:

- Inaad keento cunugaaga ay dacwadu la xariirto si uu usoo xaadiro
- Inaad codsato in dhageysiga loo furo dadwaynaha
- Inaad hesho qareen ama dad aqoon u leh carruurtaada naafada ah si ay kuula joogaan ayna kuula taliyaan
- Inaad soo bandhigto caddeyn (caddeymo), diidmo, iyo su'aalo aad waydiiso (su'aal) marqaatiyaasha iyo inaad u baahato imaanshaha marqaatiyaal (mar kale, dhageysiguna wuxuu awooda saari doonaa kaliya arrimaha aad ku soo bandhigtay cabashadaada nidaamka

cadaaladeed, ilaa ay hay'adu ogolaato inay kuu ogolaato inaad soo bandhigto arimo cusub maahee)
- Inaad mamnuucdo wixii caddayn ah ee la soo bandhigay ee aan lagu tusin ugu yaraan shan maalmood oo shaqo ka hor waqtiga dhageysiga
- Adoon wax kharash ah bixineyn, waa inaad halesho qoraal eray-ka eray ah (ama elektaroonig ah, haddii aad sidaas dooneyso) oo ah diiwaanka dhageysiga, iyo diiwaanada natiijo kasta iyo go'aano kasta.

**Haddii ay Ku Wehliyaan U doodayaal aan Ahayn Qareeno**

Haddii uu ku wehliyaan u doodayaal aan ahayn qareeno, shaqsiyaadkaan xaq uma lahan inay ka helaan khidmadaha qareenka (qareenada) (ama khidmadaha adeegyadooda) dhinaca kale. U dooduhu kuma dhaqmi karo sharciga dhageysiga ku lug lahaanshaha u doodahana waa la xaddidi karaa inta lagu jiro muddada dacwada.

# Waqtiga iyo Nidaamka Cabashada ee La Dedejiyay

Dhageysiga nidaamka caddaada ah ee degdega ah waa dhageysi loo qabto si degdeg ah oo fududeeya xallinta degdegga ah ee khilaafaadka waxbarashada gaarka ah qaarkood. Adiga ama hay'ada waxbarashadu midkiin ayaa soo gudbin kara codsiga dhageysiga nidaamka caddaalada ah ee xaaladahaan kaliya haddii:

1. Aad su'aal ka qabto go'aanka Hay'ada waxbarashada ee ku saabsan meelaynta waxbarashada cunugaaga (barnaamijka ama adeegyada), arrintaasna ay keentay tallaabada edbinta dugsiga ee cunugaaga; ama
2. Aadan ku qancin natiijooyinka lagu go'aamiyay go'aanka; ama
3. Hay'ada waxbarashadu waxay aaminsan tahay in meelaynta goobta waxbarasho ee cunugaaga ee hadda (barnaamijka ama adeegyada) ay aad ugu dhawdahay inay keento dhaawac gaara cunugaaga ama kuwa kaleba.

Waqtiga cabashada nidaamka cadaalada ee la dedejiyay waxa ku jira waqtiga xallinta 15 ka maalmood ah iyo waqtiga dhagaysiga ee 20 ka maalmo ah ahna kuwa dugsiga. Hay'ada waxbarashadu waa inay qorsheysaa kulan xal lagu raadinaayo todoba maalmood gudahooda marka la helo cabashada nidaamka caddaalad dhowrista ah. Ka dib marka la dedejiyo dhageysiga dacwada, sarkaalka dhageysiga dacwada wuxuu heystaa 10 maalmood oo ah kuwa dugsigu jiro si uu u qoro go'aanka kama dambeysta ah oo uu ku siiyo adiga iyo hay'ada waxbarashada. Waqti dheeraad ah laguma dari doono inta lagu jiro cabashada nidaamka cadaaladeed ee la dedejiyay.

# Racfaan ka Qaadashada Go'aanka

Go'aanka uu gaaro sarkaalka dhagaysiga caddaalada ah marka uu soo gabagabeynaayo dhageysiga caddaalada ah waa kama dambeys ilaa dhinaca cabashada qaba soo gudbiyo maahee racdaan uuna u gudbiyo Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio 45 maalmood gudahooda kadib go'aanka. Dhinaca cabashada qaba wuxuu noqon karaa midkood waalidka ama hay'ada waxbarashada marka go'aanka sarkaalka dhageysigu keeno inuusan dhincaas ku qancin (taasoo macnaheedu yahay in dhinacaas guulaysan waayay).

### SIDA RACFAAN LOOGA QAATO GO'AANADA SARKAALKA DHAGEYSIGA DACWADA

Si aad racfaan uga qaadato go'aanka sarkaalka dhageysiga dacwada, waa inaad u dirtaa ama aad iimayl u dirtaa nuqul rafcaankaaga kamid ah oo qoraal ah Waaxda waana inaad sidoo kale nuqulka rafcaanka u dirtaa maamulaha guud ee hay'ada waxbarashadaada. Waaxdu waxay magacaabi doontaa sarkaal dib u eegis heer gobal ah sameeya (ama “Sarkaalka dib u eegis”) si uu u qabto dib u-eegis dhexdhexaadnimo ah oo lagu eegaayo go'aanka nidaamka caddaalada ah. Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ayaa bixin doonta kharashka sarkaalka dib u eegista.

Sarkaalka dib u eegista ayaa eegi doona diiwaanada dhammaan dhageysiga nidaamka caddaalad ah. Intaa waxaa sii dheer, sarkaalka dib u eegista ayaa hubin doona in dhageysigu u hogaansamay shuruudaha nidaamka caddaalada ah oo uuna raadiyay caddayn dheeraad ah si loogu go'aamiyo waxyaabaha muhiimka ah. Sarkaalka dib u eegista sameynaaya wuxuu ka codsan karaa dood af ah ama qoraal ah adiga iyo hay'ada waxbarashada. Haddii sarkaalka dib u eegista uu qabto dhageysiga si uu u tixgeliyo dooda afka ah, dhammaan xuquuqaha dhageysiga (fiiri bogga 25 aad) ee lagugu siiyay dhageysiga dacwadda ayaa sidoo kale lagu siinayaa inta lagu jiro dhageysiga ka hor sarkaalka dib u eegista.

### WAQTIYADA/MUDDADA DHEERAADKA AH EE LAGU DARO

30 Maalmood gudahood ka dib marka Waaxdu ay hesho codsigaaga dib u eegista heerka gobol, sarkaalka dib u eegista qabanaaya ayaa soo saari doona go'aan, in in asaga ama ayadu bixiso maahee waqti dheeraad ah, oo uu codsan karo waalidka ama hay'ada waxbarashada (hase yeeshee, ogsoonoow in muddada la kordhinaayo inaan la bixin karin inta lagu jiro muddada racfaan dhageysiga degdegga ah). Waxa kale oo aad codsan kartaa nuqulo qoraal ah ama qoraal elektaroonig ah oo ku saabsan natiijooyinka sarkaalka dib u eegista iyo go'aamada labadaba ah.

### RACFAAN U GUDBINTA MAXKAMADA FEDERAALKA AMA TAN GOBALKA

Go'aanka dib u eegista heerka gobol waa kama dambeys ilaa in rafcaan loo gudbiyo maahee maxkamadda federaalka ama tan gobolka. Dhinaca cabashada qaba (oo aan ku guuleysan) go'aanka sarkaalka dib u eegista wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad ku xareeyo maxkamada degmada federaalka 90 maalmood gudahooda oo laga bilaabaayo taariikhda go'aanka sarkaalka dib u eegista ama maxkamada racfaanka guud ee degmada ay ku taalo hay'ada waxbarashada cunugaaga 45 maalmood gudahooda marka la helo ogeysiiska go'aanka sarkaalka. Maxkamadu waxay dib u eegis ku sameyn doontaa diiwaanada, waxay dhegaysan doontaa caddayn dheeraad ah oo la xariira codsiga dhinacyada, ka dibna waxay gaari doontaa go'aan kama dambeys ah oo ku salaysan diiwaanada iyo caddaynta la soo bandhigay. Waa inaad bixisaa kharashaadka maxkamada racfaanka aad ka xareyso laakiin haddii aad ka guuleysato, waxa aad xaq u yeelan kartaa khidmadaha maxkamada iyo kharashka qareenka  haddii ay sidaas go'aamiso maxkamada.

## Xaalada Carruurta inta lagu Jiro Nidaamka Dhageysiga

- Cunugaagu waa inuu kusii jiraa ama sii joogaa goobta waxbarashada ee hadda inta nidaamka cabashada uu socdo, haddii adiga iyo hay'ada waxbarashada aad isku raacsan tihiin in goobta waxbarashada cunugaagu ay isbadeli karto.
- Meelaynta goobta waxbarashada ee cunugaaga hadda waa midka lagu sharaxay IEP-kiisa ugu dambeeyay ee la hirgeliyay.

- Haddii canugaaga laga qoro IAES (oo ah goob waxbarasho oo ku meel-gaar ah, ama goob waxbarasho oo ku meel-gaar ah oo ka baxsan dugsiga) sababo la xariira edbinta hay'ada waxbarashada, cunugaagu wuxuu joogayaa goobtaas waxbarashada ilaa sarkaalka dhageysiga uu go'aan ka gaaro ama ilaa edbinta hay'ada waxbarashada ee cunugaaga dhammaato, hadba kan soo hormara.
- Haddii nidaamka cabashada loo baahan yahay uu ku lug leeyahay diiwaangelinrta hore ee hay'ada waxbarashada, cunugaaga, marka la helo oggolaanshahaaga, waa in laga qoraa hay'ada waxbarashada illaa iyo inta nidaamka dhageysiga caddaalada dhamaaneyso.
- Haddii nidaamka cabashada loo baahan yahay uu ku lug leeyahay codsiga ah in la bilaabo adeegyada ardayda ka hooseeya da'da dugsiga sida sharcigu qabo sababo la xariira in cunugaagu gaaray saddex sano oo uusana hadda u qalmin adeegyada hoos yimaada qaybta hore ee faragelinta sharciga, hay'ada waxbarashada looma baahna inay bixiso adeegyada faragelinta hore ee cunugaaga uusan helin.
- Haddii cunugaagu u qalmo adeegyada waxbarashada gaarka ah waalidkuna oggolaado bixinta adeegyada hore, markaas hay'ada waxbarashada waa inay siisaa adeegyadaas aysan khilaafka ka qabin waalidka iyo hay'ada waxbarashada.
- Haddii sarkaalka dib u eegista uu kugu raacsan yahay in isbadelka meeleynta goobta uu habboon yahay, goobta meeleynta waa in loo tixgeliyaa sida heshiis u dhexeeya gobolka iyo waalidka ayadoo ujeedadu tahay in joogitaanka.

**Si aad u Codsato Racfaan aad ka Qaadato Go'aanka Sarkaalka Dhageysiga Caddaalada ah**

Waxaad ku diidi kartaa go'aanka sarkaalka dhageysiga caddaalada ah (rafcaan) qoraal ah muddo 45 maalmood gudahooda ah kadib marka aad hesho go'aanka. U dir racfaankaaga:

Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio
Qaybta Xallinta Khilaafaadka ee Xafiiska Carruurta Baahiyaha Qaba
25 South Front Street Mail Stop 409
Columbus, Ohio 43215
OECdueprocess@education.ohio.gov

Si aad u hesho caawimaad dheeraad ah, fadlan wac Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba ood ka wici karto (614) 466-2650, ama taleefan bilaash ah (877) 644-6338.

# Khidmadaha Qareenka

Waxaad dooran kartaa inaad shaqaaleysiiso qareen (garsoore) waqti kasta si uu kuu matalo inta lagu jiro nidaamka caddaalada ah (ama dacwadaha racfaanka go'aanka nidaamka caddaalada ah), laakiin waa inaad bixisaa kharashkaaga sharciga ku baxa. Haddii aad doorato inaad shaqaaleysiiso qareen oo aadna kiiska ku guuleysato (aad hesho go'aan wanaagsan) tallaabada ama dacwada maxkamaa federaalka ama gobolka ee la xiriirta nidaamka dhageysiga caddaalada (oo ka dhigaaya dhinacaaga mid guuleystay), maxkamadu waxay ku amri kartaa hay'ada waxbarashada inay ku bixiso khidmadaha qareenka ee macquulka ah.

## HADDII HAY'ADA WAXBARASHU GUULEYSATO

Haddii hay'ada waxbarashada ay guuleysato, maxkamadu waxay kugu amri kartaa inaad bixiso khidmadaha qareenka ee macquulka ah ee hay'ada waxbarashada ka baxay. Maxkamadu waxay ku

amri kartaa adiga ama qareenkaaga inaad bixisaan khidmadaha qareenka ee Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio ka baxay ama hay'adaada waxbarashada haddii ay kaa guuleystaan oo ay maxkamadu go'aansato mid ka mid ah arrimahaan soo socda:

- Haddii tallaabada ahayd mid aan dhab ahayn, macquul ahayn, oo aan lahayn asal sax ah
- Haddii aad sii waday inaad keento tallaabo sharci ka dib markii tallaabadu si cad u noqday mid aaan ahayn dhab, macquul, ama lahayn aasaas dhab ah
- Haddii tallaabada loo keenay ujeeddo aan habboonayn, sida in la geysto dhibaato, dib u dhac aan loo baahnayn, ama si aan loo baahnayn loo kordhiyo kharashka khidmadaha sharciga ku baxa

**HADDII MAXKAMADU AMARTO IN KHIDMADAHA SHARCIGA LAGUU CELIYO ADIGA AMA LOO CELIYO HAY'ADA WAXBARASHADA**

Haddii maxkamadu amarto in khidmadaha sharciga ah laguu celiyo adiga ama loo celiyo hay'ada waxbarashada, maxkamadu waxay go'aamin doontaa xaddiga macquul ah. Khidmadaha qareenka waa in lagu saleeyaa qiimaha caadiga ah ee bulshada ee ku baxa tallaabada ama dacwadaha la soo gudbiyo, iyo nooca iyo tayada adeegyada la bixiyay. Waxaa jira xadidaadyo gaar ah oo ku saabsan awooda maxkamada si ay u bixiso kharashaadka qareenka.

Maxkamad ma bixin karto kharashka qareenka marka xaaladahaan jiraan:

- Marka hay'ada waxbarashada ay soo bandhigto dalab qoraal ah oo lagu xalinayo khilaafka 10 maalmood gudahood dacwada, oo aadan aqbalin dalabkaan 10 ka maalmood gudahood, go'aanka kiiskuna uusan kugu habbooneyn marka loo eego xallinta ay soo jeedisay hay'ada waxbarashada.
    - Hase yeeshee, maxkamadu ay ku siin karto khidmadaha haddii aad ku guuleysato kiiska maxkamaddna ay go'aamiso inaad si weyn u caddeysay kiisaka (haysato sabab wanaagsan) oo keeneysa inaadan aqbalin dalabkii xalka ee hay'ada waxbarashada.
- Marka qareenkaaga ka qaybgalo kulanka IEP, ilaa in kulankaas loo qabto maahee sababo la xariira dhageysiga maamulka ama dacwada maxkamadda
- Ka qaybqaadashada qareenkaaga kulanka xal raadinta

**HOOS U DHIGISTA KHIDMADAHA QAREENKA**

Maxkamadu waxay sidoo kale yareyn kartaa abaalmarinta khidmadaha qareenka haddii:

- Inta lagu guda jiro dacwada, adiga ama qareenkaaga si aan macquul ahayn u dib u dhigay xalka kama dambeysta ah ee khilaafka
- Cadadka khidmadaha qareenkaaga ayaa si aan macquul ahayn uga sarreeya heerka saacadii ee ah cadadka ugu sarreeya ee bulshada ee lagu bixiyo adeegyada la midka ah ee qareenada xirfadaha macquulka ah, sumcada, iyo waayo aragnimada
- Waqtiga iyo adeegyada sharciga ee aad heshay ay ahaayeen kuwo xad dhaaf ah (aad u badan) marka la eego xaalada ficilka ama dacwada
- Qareenkaaga siin macluumaad ku habboon hay'ada waxbarashada ogeysiiskaaga cabashada

Midna arrimaha kor ku xusan ma khuseyso haddii maxkamadu oggaato in gobolka ama hay'ada waxbarashada ay si aan macquul ahayn u daahisay xalka kama dambeysta ah ee kiiska ama sii wadista dacwada, ama haddii kale ay ku xadgudubtay ilaalada habraaca IDEA.



Department of Education & Workforce

# Anshaxa

## Habraacyada Anshaxa ee Carruurta Qaba Naafonimada

Xaaladaha qaarkood, hay'adaada waxbarashadu waxa laga yaabaa inay sii wado bixinta adeegyada waxbarashada gaarka ah ee cunugaaga naafada ah, xataa ka dib marka hay'ada waxbarashadu ay joojisay, erido, ama haddii kale ka meesha ka saarto cunugaaga meelayntiisa waxbarasho ee hadda (eeg IEP-da cunugaaga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan meelayntiisa ama goobta meeleynteeda hadda).

### GOOBTA MEELEYNTA WAXBARASHADA IYO BADELKA

Haddii cunugaaga laga saaro goobtiisa meeleynta waxbarasho ee hadda sababo la xariira inuu sameeyay ku xadgudka xeerarka hay'ada waxbarashada wax ka yar 10 maalmood oo ah kuwa dugsiga oo isku xigta, hay'ada waxbarashada uma baahna inay siiso cunugaaga adeegyada waxbarashada gaarka ah inta lagu jiro waqtigaas. Haddii cunugaaga dugsiga laga saaro *in ka badan 10 maalmood oo isku xiga ahna kuwa dugsigu jiro*, dugsiga waa inuu sii wadaa inuu cunugaaga siiyo adeegyo waxbarasho oo gaar ah, xitaa haddii lagu siinaayo goob kale oo waxbarasho (tusaale ahaan, fasal kale, dhisme, ama guriga ardayga).

Haddii hay'ada waxbarashadu cunugaaga ka saarto goobta meelaynta hadda uu ku jiro in ka badan 10 maalmood oo uu dugsigu jiro oo isku xigta isla sanad dugsiyeedka, waxaa loo tixgeliyaa in la badeley meelaynta waxbarashada cunugaaga.

Haddii hay'ada waxbarashada ay cunugaaga ka saartay goobta meelayntiisa ama meeleynteeda waxbarashada ee hadda marar kaladuwan (dhowr jeer oo isku xigta laga saaro) oo isku dar noqoneysa in ka badan 10 maalmood sannad dugsiyeedka, dugsigu waa inuu go'aamiyaa in saaristaas keeneyso badelka goobta meeleynta cunugaaga.

Marka la eegaayo go'aaminta, dugsigu waa inuu tixgeliyaa waxyaabahaan soo socda:

- Muddada waqti kasta cunugaaga goobta laga saaray
- Isku darka waqtiga cunugaaga goobta laga saaray
- Inta ay isku jireen muddada cunuga goobta laga saaray
- Habdhaqanada cunugaaga ee isku midka ahaa ee keenay dhacdada looga saaray cunugaaga goobta meeleynta

Marka la badelaayo goobta meelaynta waxbarashada ilmaha sababo la xariira in cunugaagu raacin xeerarka dugsiga, hay'ada waxbarashada, waalidka, iyo xubnaha khuseeya ee kooxda IEP-da, sida uu go'aamiyo waalidka iyo hay'ada waxbarashada, waa inay buuxiyaan si loo sameeyo dib u eegis go'aaminta waxa Sababay dhaqanka. Ujeedada dib u eegista go'aaminta waa in la oggaado in habdhaqanka cunugaaga uu sababay ama uu xiriir toos ah iyo mid la taaban karo la leeyahay naafonimada cunugaaga.



# Go'aaminta Waxa Sababay Habdhaqanka

Ka hor inta aan la badelin goobta meelaynta waxbarashada cunugaaga sababo la xariira dhaqankiisa, hay'ada waxbarashada waa inay qaadaa tallaabooyin gaar ah si ay u ilaaliso xuquuqda cunugaaga. Mid ka mid ah tallaabooyinka waa in la qabto kulan dib loogu eegaayo waxa keenay habdhaqanka. Kani waa kulan si lagu oggaanaayo in habdhaqanka cunugaagu uu sababay ama uu xiriir toos ah iyo mid weyn la lahaa naafonimada cunugaaga. Si kale haddii loo dhigo, habdhaqanka cunugaagu ma waxaa sababay naafonimadiisa? Kooxda IEP ee ardayga ayaa go'aamin doonta in habdhaqanka cunugaaga uu sababay naafonimada 10 maalmood oo kuwa dugsigu jiro ah ka dib go'aan kasta oo lagu badelayo goobta meeleynta waxbarashada.

## KULANKA DIB LOOGU EEGAAYO WAXA SABABAY HABDHAQANKA

Kulanka dib u eegista waxa sababay habdhaqanka, adiga iyo xubnaha kale ee kooxda IEP waxay dib u eegaysaan macluumaadka khuseeya oo ay ku jiraan IEP-ga cunugaaga, qiimeynta macallinka iyo wixii macluumaad la xiriira oo aad bixiso.

Haddii habdhaqanku muujinayo inuu ka yimaaday naafonimada cunugaagu qabo oowgeed, cunugaaga waxaa lagu soo celin doonaa goobta meeleynta laga saaray, haddii kooxda IEP aysan ogolayn baddelka meeleynta.

Haddii habdhaqanka cunugaaga loo arko inuu muujinaayo naafonimada, kooxda IEP waa inay:

1. Biloowdo qiimeynta habdhaqan oo la qabanaayo 10 maalmood gudahood waana in la dhammaystiro sida ugu dhakhsaha badan. Qiimeynta habdhaqanka habboon waa dib u eegis ku saabsan habdhaqanka cunugaaga waxaana loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo waxa ka jira goobta cunugaaga ee kicinaya habdhaqanka aan habboonayn, iyo sidoo kale dabeecadaha badelka ah ee loo baahan yahay in la baro si cunugaagu u helo natiijooyin wanaagsan iyo jawaab celin, iyo



Department of Education & Workforce

2. Biloowdo qorshaha wax ka qabashada habdhaqanka ee cunugaaga haddii qiimeynta habdhaqanka habboon ay horey u dhammaatay oo ay la xiriirto edbinta markaas ilmaha lagu sameeyo (qorshaha wax ka qabashada habdhaqanka ayaa wax ka qabta habdhaqanada aan ku habbooneyn dugsiga iyo xaaladaha gaarka ah ee dugsigu isku dayi doono inuu yareeyo), ama
3. Haddii qorshaha wax ka qabashada habdhaqanka uu horey u jiray, dib u eeg qorshaha oo samee wixii isbadel ah ee loo baahdo 10 maalmood gudahood.

## Badelka Ku Meel Gaarka ah ee Goobta Waxbarashada (Ku Meel Gaarka ah iyo Ka duwan)

Go'aanka ah in cunugaaga lagu meeleeyo goob waxbarasho oo ku meel gaar ah (interim alternative educational setting, IAES) waxaa gaaraya kooxda IEP ee cunugaaga. IAES waa goob meelayn oo kale oo ku meel gaar ah oo loogu talagalay cunugaaga si uu u helo waxbarashada gaarka ah. Taariikhda kooxda IEP-da ay gaaraan go'aanka ah inay u badelaan goobta meelaynta cunugaaga una ku badelaan IAES sababo la xariira in cunugu uu ku xadgudbay sharciga dugsiga, hay'ada waxbarashadu waa inay ku ogeysiiso go'aanka oo ay ku siiso Hagaha Xuquuqda Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah.

Xataa haddii habdhaqanka cunugaagu uu sababay naafonimada uu qabo, hay'ada waxbarashada ayaa cunugaaga ka saari karta goobta IAES ilaa 45 maalmood oo dugsigu jiro haddii cunugaagu:

- Soo qaato hub
- Si kas ah u haysto ama u adeegsado daroogo sharci daro ah, u iibiyo ama iskugu dayo inuu iibiyo ama sii gado mukhaadaraad la xakameeyo (tusaale, maandooriye)
- Geysto waxyeello jir oo aad u daran uuna u geysto qof kale

Arrintaan waxay caadiyan khuseysaa haddii cunugaagu sameeyay dhaqan uu geystay asagoo dugsiga usoo socda, jooga gudaha dugsiga, ama ka qaybgalaya hawl dugsi.

Haddii habdhaqanka cunugaaga *uusan si toos ah u keeninin naafonimo uu qabo*, cunugaaga waxaa la gelin doonaa goobta IAES isla muddada la gelin lahaa ilmaha aan naafada ahayn si loo tarbiyeeyo.

**Marka Habdhaqanka Cunugaagu Ka dhasho Naafonimo Laga Shakisan yahay**

Haddii cunugaagu uusan lahayn IEP, waxaa laga yaabaa inaad ka codsato dugsiga inuu cunugaaga ula dhaqmo sidii ilmo naafo ah haddii mid ka mid ah waxyaabahaas ay dhaceen ka hor inta uusan cunugaagu ku xadgudbin xeerka dugsiga:

- Waxaad u sheegtay shaqaalaha maamulka dugsiga ama macalinka cunugaaga, adoo u maraya hab qoraal ahaan, in aad u malaynayso in cunugaagu u baahan karo adeegyo waxbarasho oo gaar ah, ama
- Waxaad codsatay qiimeyn lagu sameeyo cunugaaga, ama
- Macalinka cunugaaga ama xubin kale oo ka tirsan shaqaalaha dugsiga ayaa si toos ah ugu sheegay agaasimaha waxbarashada gaarka ah ama shaqaalaha kale ee kormeerka walaaca gaarka ah ee ku saabsan habdhaqanka cunugaaga.
- Hay'ada waxbarashadaada lagama filaayo inay cunugaaga ula dhaqanto sidii ilmo naafo ah haddii aad diido oggolaanshaha hay'ada ku qiimeyneyso cunugaaga si loo eego inuu u baahan yahay waxbarashada gaarka ah. Tani sidoo kale waxay run noqonaysaa haddii aad diiday waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee cunugaaga ama haddii cunugaaga la qiimeeyo oo kooxdu oggaatay inuu qabo naafonimo. Hay'ada waxbarashadu waxay tallaabo edbin marsiin kartaa cunugaaga si la mid ah sidii ay u edbin lahayd ardayda aan naafada ahayn ee u dhaqma habdhaqankaas oo kale.



Department of Education & Workforce

Haddii habdhaqanka *uu si toos ah u keenaayo naafonimo uu qabo* cunugaaguna uu ku xadgudbay sharciyada dugsiga, cunugaaga waa in lagu soo celiyaa goobtii waxbarasho ee isaga ama iyada laga saaray, ilaa adiga iyo hay'ada waxbarashadu ku heshiiyaan badelka meelaynta taas oo qayb ka ah isbadelka qorshaha wax  ka qabashada habdhaqanka ama IEP.

Hase yeeshee, haddii hay'ada waxbarashada ay aaminsan tahay in haddii lagu hayo cunugaag goobtiisa waxbarasho ee hadda (sida laga soo xigtay IEP-ga cunugaaga) ay aad ugu badan inuu dhaawac gaaro cunugaaga ama ilmaha kale, hay'ada waxbarashada waxay qaban kartaa kulan IEP ah si looga wada hadlo walaacyadaan. Haddii adiga iyo hay ada waxbarashadu aad ku heshiin waaysaan isbadelka goobta meeleynta, hay'ada waxbarashada ayaa laga yaabaa inay codsato dhageysiga hanaanka degdegga ah — si kale haddii loo dhigo, waxaa laga yaabaa inay codsato dhageysi xal degdeg ah lagu gaaro (ka eeg dhageysiga degdegga ah ee caddaalada ah bogga 25 aad).

## HADDII AADAN AQBALIN BADELKA GOOBTA WAXBARASHADA AMA DHAGEYSIGA DIB U EEGISTA WAXA KEENEY HABDHAQANKA

Waxaad codsan kartaa dhageysiga nidaamka caddaalada ah oo la dedejiyey si aad uga doodo go'aanka lagu badelayo goobta waxbarashada cunugaaga hadda sababo edbin awgood ama si aad uga hortimaado natiijooyinka go'aanka dib u eegista (ka eeg macluumaadka nidaamka dhageysiga caddaalada ah bogga 25 aad). Sarkaalka dhageysiga caddaalada ah wuxuu go'aamin doonaa inta lagu jiro nidaamka dhageysiga degdegga ah in hay'ada waxbarashada ay raacday shuruudaha markii ay badeshay goobta meelaynta cunugaaga ama in hay'ada waxbarashada ay muujisay in habdhaqanka cunugaaga uu ahaa ama uusan ahayn mid muujinaya naafonimada uu qabo cunugaaga.

Sida kor ku xusan, hay'ada waxbarashada ayaa laga yaabaa inay codsato nidaam dhageysiga oo degdeg ah haddii hay'ada waxbarashada ay aaminsan tahay in sii wadista goobta meeleynta cunugaaga ay aad ugu dhaw dahay inay dhaawac u geysaneyso cunugaaga ama ilmaha kale (ka eeg nidaam dhageysiga degdegga ah bogga 25 aad).

# Meeleynta Keliya ee Carruurta Naafada ah ee ay dhalleen Waalidiinta Dugsiga Gaarka ah ayna kharashka Dadku Dhiibaan

## Nidaamka Go'aaminta Dib u celinta Lacagta

Haddii aad doorato inaad cunugaaga geliso dugsi gaar loo leeyahay, hay'ada waxbarashadaada ma ahan inay bixiso kharashka waxbarashada ama waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira dugsiga gaarka loo leeyahay, ilaa iyo inta ay hay'ada waxbarashadu usoo bandhigeyso cunugaaga waxbarasho dawladeed oo bilaash ah (FAPE) oo ay bixiso hay'ada waxbarashada. Haddii aad aaminsantahay in hay'ada waxbarashadu ay ku guuldareysatay inay cunugaaga siiso FAPE, waxaad haysataa ikhtiyaarka aad ku xerayn karto cabashada nidaamka dhageysiga caddaalada ah oo lagu qabanayo iyo sarkaalka dhageysiga caddaalada ah ayaana soo saari doona go'aan ah in hay'ada waxbarashadu ay FAPE siiso cunugaaga iyo in kale (ka eeg macluumaadka nidaamka dhageysiga caddaalada ah bogga 24 aad). Haddii uu oggaado sarkaalka dhageysiga caddaalada ah inta lagu jiro nidaamka cadaaladda in hay'adaada waxbarashadu aysan bixin FAPE, sarkaalka dhageysiga ayaa go'aamin kara inaad xaq u leedahay in laguu soo celiyo lacagta (dib laguu siiyo) kharashkaaga kaaga baxay ka diiwaangelinta cunugaaga dugsi gaar loo leeyahay.

### YAREYNTA AMA DIB USOO CELINTA LACAGTA

Cadadka lacagta ayaa laga yaabaa in hay'adda waxbarashada looga baahan yahay inay kuu soo celiso ayaa la yareyn karaa, ama waxaa laga yaabaa inaad gebi ahaanba lumiso lacag celin, haddii mid ka mid ah arrimahaan soo socda ay dhacaan:

- Kulanka IEP ee dhacay ka hor intaadan cunugaaga laga saarin dugsiga, haddii aadan u sheegin in aadan aqbali doonin goobta meeleynta waxbarashada ee ay soo jeedisay kooxda IEP aadana u sheegin walaacaaga, iyo in aad qorsheyneyso inaad cunugaaga ka qorto dugsi gaar loo leeyahay
- Haddii aadan u sheegin dugsiga adoo u maraya hab qoraal ah ugu yaraan 10 maalmood oo shaqo ka hor intaadan cunugaaga ka bixin hay'ada waxbarashada in aadan aqbalin doonin IEP oo aad qorsheyneyso inaad cunugaaga ka qorto dugsi gaar loo leeyahay (ogoow in 10-ka maalmood ee shaqada ay ka mid yihiin fasaxyada la galo maalmaha asbuuca)
- Haddii, ka hor inta aan cunugaaga laga saarin dugsiga, hay'ada waxbarashada ay ku siisay ogeysiis qoraal ah oo sax ah oo ay qorsheysay inay qiimeyso cunugaaga, oo aadan cunugaaga ka dhigin mid diyaar u ah qiimeynta
- Haddii maxkamadu ay go'aamiso inaad si aan macquul ahayn u dhaqantay

### ILAALINTA LACAG CELINTA

Lacag celinta (cadadka lacagta ay tahay in dib laguugu celiyo) lama dhimi karo, laguuma diidi karo lacag bixinta, haddii mid ka mid ah arrimahaan soo socda ay dhacaan:

- Haddii hay'ada waxbarashada ayaa kaa hor istaagtay inaad bixiso ogeysiis
- Haddii hay'ada waxbarashadu aysan kuu sheegin in lagaa doonayo inaad ogeysiis bixiso
- Haddii bixinta ogeysiiska ay waxyeello jireed u geysan karto cunugaaga

Sidoo kale, haddii maxkamada ama sarkaalka dhageysiga laga yaabo inuu ogaado in kharashka lacag celinta laga yaabo inaan lagaa dhimin ama laguugu diidin inaad ku guuldareysato inaad bixiso ogeysiiskaan haddii:

- Haddii aadan akhrin karin ama aadan qori karin Ingiriis, ama
- Haddii bixinta ogeysiiska ay u horseedi karto waxyeello weyn oo shucuur cunugaaga.

# Ogeysiiska Waalidka ee Barnaamijyada Deeqda Waxbarashada ee loogu talagalay Ardayda qaba Naafonimada

## Marka Ogeysiiska Dhaco

Mar kasta oo hay'ad waxbarasho ay dhammeystirto qiimeynta ilmaha naafada ah, ama ay billoowdo horumarinta, dib u eegista, ama dib u qiimeynta IEP-da ilmaha, hay'ada waxbarashada waa inay kuu sheegtaa Barnaamijka Deeqda waxbaraxshada Ootasimka iyo Barnaamijka Deeqda waxbarashada ee Jon Peterson.

### BARNAAMIJKA DEEQDA WAXBARASHADA OOTASIMKA

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Ootasimka, booqo webseedka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio oo ah education.ohio.gov oo ku qor ***Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Ootasimka*** qaybta baaritaanka, ama iimayl u dir autismscholarship@education.ohio.gov.

### BARNAAMIJKA DEEQDA WAXBARASHADA BAAHIYAHA GAARKA AH EE JON PETERSON

Haddii cunugaagu helaayo adeegyo waxbarasho oo gaar ah, waxaad u qalmi kartaa Barnaamijka Baahida Gaarka ah ee Jon Peterson.

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan Barnaamijka Deeqda Baahiyaha Gaarka ah ee Jon Peterson, booqo webseedka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio oo ah education.ohio.gov oo ku qor ***Jon Peterson Scholarship*** qaybta baaritaanka, ama iimayl u dir peterson.scholarship@education.ohio.gov.

**Macluumaad Dheeraad ah**

Macluumaadka ku saabsan Barnaamijka Deeqda Baahiyaha Gaarka ah ee Jon Peterson waxaa laga helaa webseedka Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio oo ah education.ohio.gov.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama haddii aad qabto su'aalo ku saabsan barnaamijyada deeqda waxbarashada, la xariira Xafiiska Ikhtiyaarada Waxbarashada aan Kuwa Dawlada ahayn oo laga helo (614) 466-5743, ama wac lambarka bilaashka ah ee (877) 644-6338.



Department of Education & Workforce